

Hagaha Tixraaca Shaqaaleynta ee loogu talagalay Daryeel Bixiyeyaasha Shaqsiga ah



Washington State
Department of Social
& Health Services

Transforming lives

Tusmada Buugga

Horudhac

Isticmaalka Hagaha Tixraaca Shaqaaleynta ee loogu talagalay Daryeel bixiyayaasha Shaqsiga ah	1
Ururka Caalamiga ah ee Shaqaalaha Adeegga 775.....	1

Hannaanka Shaqaaleynta

Loo-shaqeeyahaaga	2
Waxyaabaha Aasaasiga ah ee Shaqaaleynta.....	2
Baaritaannada Raadraaca.....	3
Saxiixida Qandaraaska DSHS.....	5

Shuruudaha Lagu Bixiyo Shahaadada

Tababarka iyo Kaaliyaha Daryeelka Guriga

Bixinta Shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA)	6
Tababarka Hanuuninta iyo Bedqabka.....	7
Shuruudda Tababarka 70-ka Saacadood	8
Ka cafisan Shahaadada Tababarka 70 Saacadood iyo Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA).....	9
Haddii aad Kaliya Bixisid Daryeelka Waalidkaaga ama Ilmahaaga	10
Haddii aad Kaliya Bixisid Daryeelka Hal Qof, 20 Saacadood ama In Ka Yar Bishii.....	10
Haddii Aadan Ka Soo Bixin Waqtiyada Kama Dambeysta ee Shahaadada ama/iyo Tababarka	11
Dib in Loo Helo Shaqadii Hore.....	11
Shuruudaha Kalkaaliyaha Xilka Lagu Wareejiyo	12
Shuruudaha Waxbarashada Joogtada ah.....	12
Shaxda Shuruudaha Tababarka Shaqaalaha Daryeelka Muddada-Dheer	13
Liisto-hubineedda Bixinta Shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga	
lee oogu talagalay Daryeel bixiyayaasha Shaqsiga ah	15

Lacag Helidda

Horudhaca ProviderOne Shaqsiga	19
Saadaha Wakhtiga Fasaxa ah ee Lacagtooda la Bixiyo (PTO)	21
Saadaha Tababarka	22
Lacagta La Bixiyo Wakhtiga Dheeraadka ah iyo Xadka toddobaadka shaqada	22
Wakhtiga Safarka	25
Lacagta Magdhowga Safarka ama Masaafada Dheer.....	28
Kordhinta Lacag Bixinta iyo Mushaarka	28

Canshuuraha iyo Waxyaabaha Laga Jaro Jeega Lacag-bixinta

Lacagta Canshuurta Dakhliga Federaalka ee Laga Jaro Shaqaalaha	29
Bayaanka Mushaarka ee W-2	31
Canshuuraha Medicare iyo Damaannada Bulshada	32

Macluumaad Guud ee Shaqaaleynta

Khiyaarada Caymiska Caafimaadka	33
Hawlgab	35
Helidda Macaamiil Dheeraad Ah	35
Magdhowga Shaqaalaha	36
Tixraacyada, Xaqiijinta Shaqaaleynta, Caddeynta Dakhliga	37
Haddii Aad Ka Tagtid Shaqadaada.....	38
Dheefaha Shaqo La'aanta	38

Ka-warbixinta Khasabka ah ee Xadgudubka

Waa kuma Qofka Weyn ee Nugul?	39
Waa Maxay Xadgudub?	39
Soo Sheegida Xadgudubka Laga Shakiyay	40
Soo Sheegida Walaaca ku saabsan Xarunta Daryeelka	41

Hagidda Deg-dega ah ee Kheyraadka.....

41



Horudhac

ISTICMAALKA HAGAHA TIXRAACA SHAQAALEYNTA EE LOOGU TALOGALAY DARYEEL BIXIYEYAASHA SHAQSIGA AH (IPs)

Ku soo dhawoow shaqadaada cusub ee ah daryeel bixiye shaqsi ah. Shaqadaadu waa muhiim. Daryeelka aad bixiso wuxuu taageeraa ficnaanshaha loo-shaqeeyahaaga waxaa ayna ku caawinaysaa isaga ama iyada in uu u noolaado si madaxbanaan intiiba ay suurtoagal tahay.

Hagahan waxaa ku qoran macluumaad ku saabsan shaqaaladaada ee ah daryeel bixiye shaqsi ah. Dib-u-eeg tasmada buugga si aad u aragto liiska mowduucyada kale ee muhiim ah ee ku qoran hagahan. Hagahan waxaad dhigataa meel soke oo aad gaari kartid waxaadna u adeegsataa sida kheyraadka macluumaadka iyo xiriirada.

URURKA CAALAMIGA AH EE SHAQAALAHA ADEEGGA 775

Dhammaan shaqaalaha daryeel bixiyaha shaqsiga ah ee bixiya daryeelka muddada-dheer waxaa ay ku jiraan unugga gorgortanka ee uu metelo Ururka Caalamiga ah Ee Shaqaalaha Adeegga (SEIU) 775. Tani waa natijada codadka aqlabiyadda ah ee ay u codeeyeen daryeel bixiyayaasha shaqsiga ah si ay u sameystaan urur sannadkii 2002. In uu ku metalo midowga ururka shaqaalaha macnaheedu waa in ururka uu galo gorgortanka dheefaha iyo xaaladaha shaqo isaga oo ka wakiil ah IPs oo keenta heshiis wadarreedka gorgortanka (CBA). Heshiiska CBA waxaa laga gorgortamaa laba sano kasta.

Daryeel bixiyayaasha shaqsiga ah (IPs) ee cusub waxaa fursad loo siiyaa in ay la kulmaan wakiilka ururka inta lagu guda jiro hannaanka qandaraas gelidda hore, marka ay ka qaybgalayaan tababarka aasaasiga ah, ka-dibna mar kale inta lagu guda jiro fasallada sii-wadashada waxbarashada. La kulmida wakiilka ka socda ururka waa khiyaari waxaa ayna ku xiran tahay daryeel bixiyaha shaqsiga ah (IP) ee kasta.

Waxaad dib-uga-eegi kartaa nuqulka hadda ee heshiiska CBA internetka adiga oo booqanaya barta Xafiiska Maareynta Maaliyadda (OFM) oo ah www.ofm.wa.gov ka-dibna ka dooranaya heshiisyo wadarreedka gorgortanka. Maxaad ka heli kasta macluumaad faah-faahsan oo ku saabsan sicirka ama inta ay le'eg tahay lacag bixintaada, marka aad filanayso in lacagta lagu kordhiyo, iyo macluumaad guud oo ku saabsan dheefahaaga shaqaaleynta.

Hadaad rabto macluumaad ku saabsan heshiiska CBA ama xubinnimada ururka, daryeel bixiyayaasha shaqsiga ah (IPs) waxaa ay la xiriiri karaan telefoonka bilaashka ah ee SEIU 775 ee Xarunta Kheyraadka Xubinka 1-866-371-3200, Isniin ilaa Jimco laga bilaabo 8AM-6PM.

Ka wac Xarunta Kheyraadka Xubinka lambarkan
1-866-371-3200 haddii aad qabtid su'aalo khuseeya heshiis wadarreedka gorgortanka, ururka, xubinnimada ururka, dheefaha ururka, ama hawlaha ururka khiyaariga ah.

Hannaanka Shaqaaleynta

LOO-SHAQEYHAAGA

Buug-gacmeedkan, marka aynu dhahno “loo-shaqeeyo” waxaan ula jeednaa qofka aad adeegyada daryeelka siisid. Loo-shaqeeyahaaga ahaan, qofka aad siisid adeegyada daryeelka ayaa ku shaqaaleeya, kuu dira shaqo, ku kormeera, wuxuuna qaataa go'aanada ku saabsan sida loo bixiyo adeegyadooda lacagta lagu bixiyo oo ay ku jiraan jadwaleynta adeegyada gudaha xadka toddobaadka shaqada ee la oggol yahay. Sidoo kale isaga ama iyada ayaa shaqada kaa cayrin kara.

Loo-shaqeeyahaaga waa macamiilka Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS). Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) waxaa ay isku duweysaa oo ay bixisaa lacagaha adeegyada aad bixin doonto. Loo-shaqeeyahaaga waxaa loogu yeeraa sida macamiilka DSHS marka aynu ka hadlayno xiriirka uu la leeyahay ama ay la leedahay DSHS.

Loo-shaqeeyahaaga waa qofka aad siisid adeegyada daryeelka ah.

WAXYAABAHA AASAASIGA AH EE SHAQAALEYNTA

Waxaa jira xaalado markaas oo DSHS aysan lacag kugu siin karin in aad noqoto daryeel bixiyaha shaqsiga ah.

Tusaale ahaan, lacag laguuguma siin karo sida daryeel bixiye shaqsi ah haddii aad:

- Doonaysid in uu noqdo daryeela lacag lagu siiyo daryeelka lammaanahiisa.
- Tahay waalidka dabiiciga ah, aad isqabtaan hooyada ama aabbaha, ama aad tahay waalidka korsanaya macmiilka carruurta ah ee da'diisu ka yar tahay ama jira toddobo iyo toban sano kaas oo u baahan taageero lacag lagu bixiyo.
- Tahay waalidka korsanaya ee daryeelaya cunug deggan xaruntaada korsashada shatiga leh ee u baahan taageero lacag lagu bixiyo.

Haddii aan xaaladahan aysan adiga ku khuseyn, weli waxaa jira shuruudo kale oo dhowr ah kuwaas oo loo baahan yahay in aad soo buuxiso ka hor inta aadan noqonin daryeel bixiyaha shaqsiga ah oo DSHS aysan wax lacag ah ku siin.

Waa in aad noqotid qof xaq u leh. Tani waxaa loola jeedaa in:

- Aad tahay 18 sano jir ama ka weyn.
- Aad dhammysid hawsha baaritaanka asalka oo natiijooyinkuna aysan kaa dhigin in aadan xaq u lahayn.
- Aadan noqon qof aan awoodin in uu la joogo carruur ama dad waaweyn oo nugul oo aan la kormeerayn iyada oo lagu saleynayo Shakhshiyada Qofka, Kartidiisa, iyo go'aaminta ku Habboonaanta.
- Aad xaq u leedahay oo aadna ka saxiixatid qandaraaska adeegyada daryeel bixiyaha shaqsiga ah ee Maamulka Naafada Koriinka/Adeegyada Guriga iyo Bulshada Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS), oggoshahay shuruudaha meesha ku qoran, oo aadna u hoggaansantid dhammaan shuruudaha qandaraaska.
- Aad buuxisid shuruudaha shahaadada iyo tababarka.
- Aadan haysanin shahaadada kaaliyaha daryeelka caafimaadka guriga oo la diiday, la hakiyay, ama la buriyay.

Kani ma ahan liis ay wax walba ku qoran yihiin; waxaa jiri kara shuruudo kale oo loo baahan yahay in aad ka soo baxdo.

BAARITAANNADA RAADRAACA

Bilaabidda

Daryeel bixiyayaasha shaqsiga ah (IPs) waxaa looga baahan yahay in ay ka gudbaan baaritaanka raadraaca ee uu sameeyo Gobolka Washington ka hor inta aan qandaraas lala galin iyo baaritaanka raadraaca faraqaadista ee FBI-da 120-maalmood gudahooda laga soo bilaabo maalinta shaqaaleynta. Sidoo kale waa in aad sameeyso baaritaanka raadraaca ee uu sameeyo Gobolka Washington ugu yaraan labo sano kasta iyo baaritaanka faraqaadista iyo kan dowladda wakhti kastoo kale ee ay waaxdu kaa codsato.

Si aad u bilowdo hannaanka baaritaannada raadraaca waxaad heli doontaa oo aad buuxin doontaa Foomka Oggolaanshaha Baaritaanka Raadraaca oo barta internetka lagu buuxiyo. Waa in aad sida runta ah uga jawaabtid dhammaan su'aalaha foomka ku qoran. Marka aad buuxiso foomka barta internetka ah, meel ku qoro Koodhkaaga Xaqiijinta. Koodhkan waxaa u baahan DSHS si ay u gasho oo ay u gudbisoo foomkaaga baaritaanka raadraaca ee aad buuxisay

Haddii aad ka gudubtid baaritaanka raadraaca ee uu sameeyo Gobolka Washington, waxaad heli doontaa tilmaamo ku saabsan foomka Ballantaada Faraqaadista si aad ballan ugu samaysatid faraqaadistaada iyo macluumaad ku saabsan waxa aad hore ugu soo qaadanaysid.

Waa muhiim in aad isla markaasba samaysatid ballantaada faraqaadista! Haddii natiijooyinkaaga 120 maalmood laga soo bilaabo maalinta shaqaaleyntaada gudahooda aysan DSHS ku helid, laguuma oggolaan doono in aad shaqaysid ilaa laga helo.

Marka aad dhammaysid baaritaanka raadraaca, waa in aad ka hesho nuqulka natiijooyinkaaga xafiiska sameeyay baaritaankaaga raadraaca. Natiijooyinkaaga baaritaanka raadraaca ku kaydso faylkaaga! Waxaad sidoo kale ka codsan kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan baaritaankaaga raadraaca ama ka codsan kartaa nuqul natiijooyinkaaga Xarunta Dhexe ee Baaritaanka Raadraaca adiga oo ka waca:

Teleefoon (360) 902-0299

Faakis (360) 902-0292

limayl BCCUInquiry@dshs.wa.gov



Xiriirkaagu ma dhaqan galayo ilaa ay ka saxiixaan adiga iyo wakiilka idman ee DSHS.

Natijoooyinka Baaritaanka Raadraaca

Sharciga gobolku kuuma oggolaanayo in qandaraas lagaala galo ama lacag ka qaadatid sanduuqyada gobolka ama federaalka haddii baaritaankaaga raadraaca uu sheegayo xukunno dembi, eedeymo aan weli go'aan laga gaarin, ama ficilo aan ficnayn oo kaa dhigaya in aadan xaq u yeelan daryeel bixinta.

Tusaalooyin dhowr ah oo ku saabsan xukunnada dembiyada ama eedeymaha aan weli go'aanka laga gaarin ee kaa dhigaya in aadan xaq u yeelan daryeel bixinta waxaa ka mid ah Weerarka 1, 2, ama 3; dembiyada ka dhanka ah carruurta; Xataayo 1; iyo Dhaca. Liis dhammeystiran ayaa laga heli karaa WAC 388-113-0020. Dib-u-eegis ku samee liiskan haddii aad qabto su'aalo ku saabsan haddii xukunka ama eedaynta ay kaa reebayaan iyo haddii kale.

Tusaale ku saabsan ficilka xun ee kaa dhigaya in aadan xaq u yeelan daryeel bixinta waxaa ka mid ah waxa laga oggaaday ee ugu dambeeyay ee xadgudubka, dayaca, dhiigmiirashada maaliyadeed ama si xun ula dhaqmidada carruurta ama qofka weyn ee nugul ee ay kugu heshay waaxda, maxkamad sharci, Waaxda Caafimaadka ama maamul kale oo edbin ama anshax-marin. Macluumaad dheeri ah oo ku saabsan ficilada xun waxaa laga heli karaa Cutubka 388-71 iyo 388-825 WAC.

Haddii aad qabtid xukunno kale ama eedeymo aan weli go'aan laga gaarin oo si toos ah kaaga dhigaynin in aadan xaq u lahayn daryeel bixinta, lacag-bixintaada ama qandaraaska waxaa dhici karta in sidoo kale la diido ama la joojiyo haddii waaxdu go'aansato in aadan u geli karin ama la joogi karin carruurta ama dadka waaweyn ee nugul kormeer la'aan.

Shakhsiyada Qofka, Kartidiisa, iyo go'aaminta ku Habboonaanta (CC&S)

Shakhsiyada qofka, kartidiisa, iyo go'aaminta ku habboonaanta waa hannaan dib-u-eegis oo ay waaxdu u adeegsato in ay ku go'aansato haddii daryeel bixiyaha shaqsiga ah (IP) uu yahay qof ku habboon in uu carruurta ama dadka waaweyn ee nugul la joogo kormeer la'aan ama iyaga oo aan lala joogin.

Haddii ay waaxdu go'aansato in aadan u geli karin carruurta ama dadka waaweyn ee nugul kormeer la'aan, lacag-bixintaada ama qandaraaskaaga waxaa dhici karta in la diido ama la joojiyo.

Qaar ka mid ah sababaha ay waaxdu u go'aansan karto in aadan u geli karin kormeer la'aan waxaa ka mid ah ku xadgudubka qamriga ama daroogada, ficilada tacaddiyadda guriga, xukunno ama eedeymo aan weli go'aan laga gaarin kuwaas oo aanan si toos ah kaaga dhigin in aadan xaq u lahayn daryeel bixinta; iyo in aadan awoodin ama aadan doonaynin in aad bixisid daryeel dad ku filan si aad uga soo baxdid baahiyada macamiilka; ama aad khatar gelinaysid caafimaadka, bedqabka, iyo ficnaanshaha macamiilkaaga. Macluumaad dheeri ah ayaa laga heli karaa Cutubka 388-71, 388-825 iyo 388-113 WAC.

SAXIIXIDDA QANDARAASKA DSHS

Kadib marka aad ka gudubtid baaritaankaaga raadraaca, si aad u noqotid qof u qalma in uu noqdo daryeel bixiye shaqsi, waa in aad waaxda siisid kaarka damaannada bulshada ansax ah ama shaqeynaya, aqoonsi sawir leh oo ansax ah kadibna waa in aad ka gudubtid baaritaanka liiska ka reeban ee federaalka si qandaraas laguula galo. Kani wuxuu noqon doonaa hannaanka la maro afar sano kasta marka aad dib u cusboonaysiinayso qandaraaskaaga.

Waxaad dib-u-eegi doontaa kadibna saxiixi doontaa Qandaraaska Adeegga Macamiilka DSHS ee loogu talagalay Adeegyada Daryeel bixiyaha Shaqsiga ka hor inta aadan shaqaynin oo lacag qaadan. Si taxadar leh dib-u-eegis ugu samee qandaraaskan! Qandaraaska wuxuu sharxayaa waxa aad oggoshahay in aad samayso marka aad aqbasho lacag-bixinta ka timid DSHS ee loogu talagalay bixinta adeegyada macamiisha DSHS. Adiga waxaad mas'uul ka tahay in aad raacdid shuruudaha qandaraaska la saxiixay una bixisid adeegyada sida waafaqsan Hagahan Tixraaca Shaqaaleynta.

Qandaraaskaaga iyo hagahan tixraaca ah waxaa ku jira shuruudo badan oo aad oggolaanaysid marka aad saxiixdo qandaraaskaaga. Kuwan waa qaar ka mid ah shuruudaha qandaraaska ee muhiimka ah iyo hagahan kuwaas oo aad ku khasab tahay in aad xusuusnaatid:

- Waxaad oggoshahay in aad bixisid adeegyada/hawlaha la oggolaaday kuwaas oo ku jira Qorshaha Adeegga Macamiilka, kuwaas oo aad ku bixisid amarka ama jihatya macamiilka iyo si waafaqsan xeerarka la dabakhi karo ee ku qoran cutubyada 388-71, 388-113, 388-114, iyo 388-825 WAC;
- Laguuma oggola in aad u shaqaysid macamiilka inta macamiilka uu ku jiro isbitaalka, rugta lagu xannaaneeyo waayeelka, ICF/IID, meelo kale oo qofka la dhigo, ama marka macamiilkaaga ama maareeyaha kiiska ee waaxda ay kugu yiraahdaan ha shaqaynin;
- Waa mas'uuliyadaada in aad hubsatid qandaraaskaaga Daryeel bixiyaha shaqsiga, baaritaankaaga raadraaca, iyo tababarka iyo shahaadada (haddii loo baahan yahay) in ay yihiin kuwo shaqeeya oo aan dhicin;
- Waa in aad si dhakhso ah ugu sheegto waaxda eedaymo kasta ee aan weli go'aan laga gaarin, xukunnada dembi, waxyaabaha la ogaaday ama ficilada kale ee xun kuwaas oo dhaca inta u dhaxaysa baaritaannada raadraaca;
- Ma sheegan kartid saacado shaqo oo aad u shaqeysay in ka badan hal macamiil inta lagu guda jiro muddo wakhti oo isku mid ah;
- Haddii aad gaari ku kaxeynaysid macaamiishaada waxaa khasab kugu ah in aad haysatid shati gaari Gobolka ah midaas oo hadda ah/shaqaynaysa iyo caymis gaari sida loogu baahanyahay sharciga dowlada ama gobolka;
- Waa in aadan u oggolaanin qof kale in uu kuu qabto waajibadkaaga shaqo ee ku xusan qandaraaskaaga; iyo
- Si aad xaq ugu yeelato lacag-bixinta, waa in aad u hoggaansantid dhammaan xeer-hoosaadyada iyo sharciyada ku habboon.

Haddii aadan raacin shuruudaha qandaraaska iyo hagahan, waxaa dhici karta in aadan awoodin in aad hesho lacag bixin iyo weliba waxaa suurtagal ah in aadba wayso qandaraaskaaga.

Shuruudaha Lagu Bixiyo Shahaadada Tababarka iyo Kaaliyaha Daryeelka Guriga iyo Tababarka (HCA)

Qaybtan waxay kugu caawin doontaa in aad fahantid shuruudahaaga shahaadada iyo tababarka. Si aad u heshid hagid deg-deg ah oo ku saabsan tallaabooyinka lagu bixiyo shahaadada iyo tababarka iyo waqtiyada kama dambeysta ah, isticmaal Liistohubineedda Shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga ee loogu talagalay Daryeel bixiyayaasha Shaqsiga ee ku qoran boggaga 15-16.

Sharcigu wuxuu uga baahan yahay shaqaalaha daryeelka muddada-dheer in ay dhammeeyaan 5 saacadood oo tababar hannuunin iyo bedqab ah kahor inta aysan bixinin daryeelka shakhsi ahaaneed ee lacagta lagu qaato. Waxaa intaan sii dheer, inta badan shaqaalaha daryeelka muddada-dheer waa in ay ku dhammeystaan 70-ka saacadood ee Tababarka Aasaasiga ah 120 maalmood gudahooda laga soo bilaabo maalinta la shaqaaleeyay. Dib-u-eegis ku samee shaxda ku qoran boggaga 13-14 si aad u oggaatid haddii ay tahay in aad dhammaysato 70-ka saacadood ee Tababarka Aasaasiga ah.

Dhammaan tababarka loogu talagalay daryeel bixiyayaasha shaqsiga ah waxaa qabta Kooxda Dheeraha ee SEIU 775.

SHAHAADADA KAALIYAHA DARYEELKA GURIGA (HCA)

Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer intooda badan waxaa looga baahan yahay in ay noqdaan Kaaliye Daryeel Guri (HCA) shahaadaysan. Haddii lagaaga baahan yahay in aad qaadatid shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA), waa in aad 14 maalmood gudahooda ee laga soo bilaabo maalinta shaqaaleynta ugu soo gudbisid codsiga Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA) Waaxda Caafimaadka (DOH). Dib-u-eegis ku samee shaxda Shuruudaha Tababarka Shaqaalaha Daryeelka Muddada-Dheer ee ku qoran boggaga 13-14 si aad u heshid macluumaad ku saabsan tababarkaaga gaarka ah iyo shuruudaha shahaado qaadashada. Waxaad haysataa 200 maalmood si aad u heshid shahaadadaada buuxda ee Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA). Waxaad heli kartaa codsiga warqadda ah ama isticmaal codsiga online-ka ah adiga oo booqanaya www.doh.wa.gov/LicensesPermitsandCertificates/ProfessionsNewReneworUpdate/HomeCareAide



Adiga waxaad mas'uul ka tahay in aad la xiriirtid Xarunta Kheyraadka Xubinka si aad isugu diiwaangelisid tababarka loo baahan yahay. Waxaad la xiriiri kartaa Xarunta Kheyraadka Xubinka adiga oo waca lambarkan 1-866-371-3200

Haddii lagaaga baahan yahay in aad ka qaadatid shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA) Waaxda Caafimaadka, oo aadna leedahay taariikhda dhibaato daroogo ama qamri, Waaxda Caafimaadka (DOH) waxaa ay ku siin kartaa shahaado/ruksad Kaaliye Daryeel Guri (HCA) oo xadidan. Shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA) ee xadidan waxaa ay saamayn kartaa awoodaada in aad u shaqayso sida daryeel bixiye shaqsiga.

Si aad u oggaatid wax badan oo ku saabsan hannaanka shahaadada qaadashada Kaaliyaha Daryeelka Guriga:

- *Akhri Liisto-hubineedda Bixinta Shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga ku qoran bogga 15-16.*
- *Ka wac isuduwaha Kaaliyaha Daryeelka Guriga Waaxda Caafimaadka lambarkan 360-236-2700.*

Si aad u noqotid Kaaliye Daryeel Guri (HCA) shahaadaysan waa in aad raacdid dhowr tallaabo oo aadna ka soo baxdid waqtiyada kama dambeysta ah. Dib-u-eegis ku samee foomka ku qoran bogga 15-16 si aad u heshid macluumaad ku saabsan sida loo buuxiyo shuruudahaaga tababarka.

Haddii aad tahay qof Ku hadalkiisa Luuqada Ingiriiska ay Xadidan tahay (tani macnaheedu waxay tahay in awoodaada akhriska, qoridda ama ku hadalka luuqada Ingiriiska ay tahay mid xadidan), waxaad xaq u yeelan doontaa shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA) ee Kumeel-gaarka ah oo ay bixiso Waaxda Caafimaadka (DOH). Shahaadada ku-meel-gaarka ah waxay kuu oggolaansaa 60 maalmood oo dheeraad ah wadar ahaan 260 maalmood) si aad u hesho shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA) ee buuxda. Si aad u sii shaqaysid, waa in aad noqotid Kaaliye Daryeel Guri (HCA) si buuxda u shahaadaysan ama u ruksadaysan ka hor inta aysan dhicin shahaadada ku-meelgaarka ah.

Si aad u heshid shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA) ee Ku-meelgaarka ah waa in aad calaamad saartid khaanada codsiga Waaxda Caafimaadka (DOH) ee tilmaamaysa in aad, “codsanayso shahaadada ku-meelgaarka ah ee ay heli karaan kaaliyaasha daryeelka guriga kuwaas oo ay xaddidan tahay awoodooda wax akhrinta, wax qorista, ama ku hadalka Ingiriiska”.

TABABARKA HANNUUNINTA IYO BEDQABKA

Waa in aad dhammaysid Tababarka Hannuuninta iyo Bedqabka kahor inta aadan bixin daryeel. Inta lagu guda jiro xilliga qandaraas gelidda, ayaa shaqaalaha DSHS waxaad ka heli doontaa tilmaamo ku saabsan sida loogu qaato online-ka tababarka Hannuuninta iyo Bedqabka. Haddii aadan awoodin in aad online-ka ku qaadatid koorsada Af Ingiriisiga ku baxda ee Hannuuninta iyo Bedqabka ikhtiyaaro badan ayaa la bixin karaa iyada oo loo marayo Kooxda Dheefaha oo ay ku jiraan bixinta Hannuunin iyo Bedqab ku baxaya luuqadahan soo socda: Ruush, Fiitnaamees, Isbaanish, Kuuriyaan iyo Cantonese/Af Jayeeska La Fududeeyay.

Kadib marka aad dhammayso tababarka Hannuuninta iyo Bedqabka online-ka lagu qaato laguuna oggolaado in aad bixiso daryeel shaqsi, waxaad awoodi doontaa in aad isku diiwaangelisid fasallada loogu baahan yahay qaybtaada daryeel bixinta qofka.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan hannaankan, kala xiriir Xarunta Kheyraadka Xubinka lambarkan 1-866-371-3200.

Si aad u oggaatid wax badan oo ku saabsan hannaanka shahaado-siinta HCA:

- Akhri Liisto-hubineedda Bixinta Shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga ku qoran bogga 15-16.
- Ka wac isuduwaha HCA ee jooga Wasaaradda Caafimaadka (DOH) lambarkan 360-236-2700.

SHURUUDA TABABARKA 70-KA SAACADOOD

Waa in aad dhammaysid Tababarka Hannuuninta iyo Bedqabka 5 saacadood socda ka hor inta aanan lacag lagugu siinin daryeel bixinta. Intaa waxaa dheer, shaqaalaha daryeelka muddada dheer intooda badan waxaa looga baahan yahay in ay ku dhammeystaan 70 saacadood oo Tababar Aasaasi ah (guud ahaan tababar 75 saacadood ah) 120 maalmood gudahooda laga soo bilaabo maalinta shaqaaleynta. Waxaad dhammeynaysaa tababarkan adiga oo u maray Kooxda Dheefaha ee SEIU 775.

- Isku-diiwaangeli tababarka 14 maalmood gudahooda laga soo bilaabo maalinta shaqaaleynta. Si aad uga heshid ka-dibna aad isugu diiwaangelisid tababar lagu qaadanayo degaankaaga, booqo mareegtada Kooxda Dheefaha SEIU 775 www.myseiubenefits.org/ ama ka wac Xarunta Kheyraadka Xubinka 1-866-371-3200. Waxaad u baahan doontaa magacaaga koowaad iyo magacaaga dambe, afarta lambar ee ugu dambeeya ee lambarkaaga damaannada bulshada iyo cinwaan iimayl si aad u gashid.
- Marka aad dhammayso 5 saacadood oo ah Tababarka Hannuuninta iyo Bedqabka iyo 70-ka saacadood ee Tababarka Aasaasiga ah, waxaad ka soo baxday shuruudaha tababarka (guud ahaan 75 saacadood) ee aad ku qaadanayso imtixaanka shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA). Aadan awoodin in aad internetka ku qaadatid koorsada ku baxda Af Ingiriisiga ee Hannuuninta iyo Bedqabka? Ikhtiyaaro badan ayaa la bixin karaa oo loo marayo kooxda dheefaha, oo ay ku jiraan in luuqadahan soo socda lagu bixiyo Hannuuninta iyo Bedqabka: Ruush, Fiitnaamees, Isbaanish, Kuuriyaan iyo Cantonese/Af Jayeeska La Fududeeyay.
- Waa in aad ka codsatid Waaxda Caafimaadka (DOH) Shahaadadaada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA) 14 maalmood gudahooda laga soo bilaabo maalinta shaqaaleynta. Haku darin ujuurada codsigaaga; Kooxda Dheefaha SEIU 775 ayaa si toos ah u siin doonta ujuurada codsigaaga Waaxda Caafimaadka. Fadlan ku calaamadee 'dowladda ayaa bixinayso' codsigaaga si aad u xaqiijiso Kooxda Dheefaha SEIU 775 in ay bixiso ujuurada codsigaaga.
- Haddii aadan ku soo gudbinin codsigaaga 14 maalmood gudahooda, waxaa ay u badan tahay in aadan awoodi doonin in aad imtixaanka samaysid ama qaadatid shahaado waqtigaaga kama dambaysta ah.
- Marka Waaxda Caafimaadka (DOH) ay kaa hesho codsiga HCA oo buuxa oo aadna dhammeysay 75 saacadood ee tababarka, waxaa ay ku wargelin doonaan ProMetric in aad diyaar u tahay qaadashada imtixaanka.



Si aad u oggaatid wax badan oo ku saabsan codsashada shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga, booqo bogga internetka Waaxda Caafimaadka (DOH): www.doh.wa.gov/LicensesPermitsandCertificates/ProfessionsNewReneworUpdate/HomeCareAide.aspx

Si aad u oggaatid wax badan oo ku saabsan imtixaanka shahaadiga ah ee Kaaliyaha Daryeelka Guriga iyo hannaanka codsashada imtixaanka, booqo bogga internetka shirkada imtixaanka ee Prometric: <https://www.prometric.com/en-us/clients/wadoh/Pages/landing.aspx>

- Qaado waqtiga imtixaanka ugu horreeya ee lagaaga soo bandhigo Prometric. Imtixaanka qaado waqti u dhow dhammaadka tababarka si aad u kordhiso awoodaada ka gudbidda/najaxidda imtixaanka. Xasuusin ahaan, Kooxda Dheefaha SEIU 775 waxaa ay bixisaa koorso naqtiimin ah oo aad qaadan karto si aad isu diyaariso ka hor imtixaankaaga. Fadlan ka wac Xarunta Kheyraadka Xubinka lambarkan 1-877-371-3200 si aad u jadwaleyso waqtiga koorsadaada naqtiiminta. Intaa waxaa dheer, in aad wayddiisan karto caawimada Towjiihiye Khibrad leh. Towjiihiyayaasha Khibbarada ah waa HCA-yo u shaaeeya Kooxda Dheefaha SEIU 775. Towjiihiyayaasha Khibbarada ah waxaa ay kugu caawin karaan kuwan soo socda:
 - Ku tababaraan bilow ilaa dhammaadka Tababar Aasaasiga
 - In ay kugu hagaan hannaanka shahaado bixinta
 - In aad ku dabaqdo xirfadaha aad ku baratay tababarka xaqiiqooyinka shaqada
 - In ay kuu noqdaan dad aad kala hadashid fursadaha kobaca mihnadeed iyo tababr dheeraad ah
 - In ay ku siiyaan taageero guud ama dhiirrigelin
 - In ay ku siiyaan taageero aqooneed iyo mid xirfadeed oo dheeraad ah si ay dib kuugu diyaariyaan dib-u-imtixaanidda
 - Booqo: www.myseibenefits.org/peermentors/
 - Ama ka wac call Towjiihiyayaasha Khibbarada ah lambarkan 1-855-803-2095
 - Ama iimayl ugu diro Towjiihiyayaasha Khibbarada ah iimaylkan Peer.Mentorship@myseibenefits.org
- Waxaad iimayl ku heli doontaa macluumaad muhiimka ah ee ku saabsan imtixaankaaga shahaadiga ah. Waxaad u baahan doontaa in aad ka jawaabto Qiridda in uu ku soo gaaray Iimaylka Imtixaanka ee laga soo diray DOH si loo hubiyo in aad ogtahay taariikhda imtixaankaaga. Kadib marka aad soo gudbisid codsigaaga, waa in aad si joogto ah u fiirisid iimaylkaaga, foldarada ku dhacaan fariimaha looga shakiyo fayraska si aad u heshid fariimaha ku saabsan imtixaankaaga. Shirkadda imtixaanka Prometric uma samayn doonto jadwal imtixaankaaga shahaadada haddii aadan ku sheegin cinwaan iimayl codsigaaga.

KA CAFISAN SHAHAADADA TABABARKA 70 SAACADOOD IYO KAALIYAHA DARYEELKA GURIGA (HCA)

Haddii lagaa reebo ama cafiyo, haddaba ma ahan in aad qaadatid tababarka 70-ka saacadood ama in aad noqotid Kaaliye Daryeel Guri (HCA) shahaadaysan. Sababaha lagaaga cafin karo waxaa kamid ah laakiin aan ku xadidnayn in aad:

- Aad tahay Kalkaaliye Diiwaangashan (RN), Kalkaaliye Caafimaad oo Ruqsad Haysta (LPN), Kalkaaliye Xirfadle Heer-sare ah Diiwaangashan (ARNP), ama Caawiye Kalkaaliye-Shahaadaysan (NAC) oo ka haysta xaalad aqoonsi wanaagsan oo shaqaysa Waaxda Caafimaadka.
- Aad haysatid shahaado waxbarid oo ay la socoto oggolaansho ku saabsan waxbarasho gaar ah oo xaalad wanaagsan ah oo ka socota Xafiiska Kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSPI).
- Ka shaqaysay inta u dhaxaysay 1/1/2011 iyo 1/6/2012 goob daryeel ku taalla gobolka Washington gudahiisa oo dhammaysay dhammaan shuruudaha tababarka wakhtigaasi.

Tusaalooyinka shaqada goobta daryeelka muddada-dheer waxaa ka mid ah bixinta daryeel lacag ah, adeegyo daryeel shakhsiyeed loogu talagalay dadka waaweyn ama dadka naafada ah ee ku nool Xarunta gobolka rukhsadaysan ee Nolasha La caawiyay (guri jiif iyo cunto leh), Guriga Qoyska Qofka weyn, Hay'adda Daryeelka Guriga, ama daryeel bixiye shaqsi ah oo siinaya daryeelka macamiilka Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS).

HADDII AAD DARYEEL KALIYA SIINAYSID WAALIDKAAGA AMA ILMAHAAGA

Haddii aad kaliya siisid daryeelka muddada-dheer waalidka ku dhaley, ku soo korsaday ama waalidka ay isqabaan waalidkaaga ama ilmo, waxaad tahay Daryeel Bixiye Ilmo Qof weyn, Daryeel Bixiye Waalid, ama Daryeel Bixiyaha Waalidka DD. Daryeel bixiyayaasha Ilmaha Qofka weyn iyo Daryeel bixiyayaasha Waalidka khasab kuma aha in ay dhammeystaan 70-ka saacadood ee Tababarka Aasaasiga ah. Dib-u-eegis ku samee jadwalka ku qoran boggaga 13-14 si aad u aragtid shuruudaha loogu talagalay qaybta daryeel bixiyaha shaqsi ee gaarka ah.

Haddii aad qaadatid macamiil aan ahayn waalidkaaga ama ilmahaaga, haddaba shuruudahaaga tababarka way isbedeli doonaan. Haddii aad u baahan tahay in laguugu caawiyo fahanka shuruudaada tababarka hadda ah, ka wac Xarunta Kheyraadka Xubinka lambarkan 1-866-371-3200.

HADDII AAD SIISID DARYEEL HAL QOF, 20 SAACADOOD AMA IN KA YAR BISHII

Haddii aad bixisid wax ka yar 20 saacadood oo daryeel ah bishii kaliya hal qof, waxaad tahay Bixiyaha Adeeg Xaddidan. Bixiyayaasha Adeegga Xadidan khasab kuma ahan in ay dhammeeyaan 70-ka saacadood ee Tababarka Aasaasiga. Dib-u-eegis ku samee jadwalka ku qoran boggaga 13-14 si aad u aragtid shuruudaha loogu talagalay Bixiyayaasha Adeegga Xadidan.

Haddii aad qaadatid macamiil kale, ama kordhisid tirada saacadaha aad shaqayso, shuruudahaaga tababarka way isbedeli doonaan. Haddii aad u baahan tahay in laguugu caawiyo fahanka shuruudaada tababarka hadda ah, ka wac Xarunta Kheyraadka Xubinka lambarkan 1-866-371-3200.

Bixiyayaasha Kaliya Daryeelka Ku-meelgaarka ah

Haddii aad bixinayso kaliya daryeel ku-meelgaar ah oo aadna shaqeyso 300 saacadood sannad kaalandar kasta, lagaagama baahna in aad dhammaysid 70-ka saacadood ee tababarka aasaasiga ah. Dib-u-eegis ku samee jadwalka ku qoran boggaga 13-14 si aad u aragtid shuruudaha loogu talagalay Bixiyayaasha Kaliya Daryeelka Ku-meelgaarka ah. Marba haddii aad dhaaftid 300 saacadood ee daryeelka kumeel-gaarka ah sannad kaalandar kasta, waa in aad dhammeysid tababar badan si aad uga soo baxdid shuruudaha 70-ka saacadood ee tababarka aasaasiga ah iyo shahaadada, iyada oo aan la eegaynin tirada saacadaha aad bixisid daryeelka ku-meelgaarka ah mustaqbalka.

Inkastoo lagaa cafin karo 70-ka saacadood ee tababarka aasaasiga ah iyo koorsooyinka sii-wadashada waxbarashada, daryeelayaal badan ayaa weli jecel in ay qaataan tababar dheeraad ah. Fadlan kala xiriir Xarunta Kheyraadka Xubinka 1-877-371-3200 si aad u oggaatid fursadaha tababar ee aad heli karto.

HADDII AADAN KASOO BIXIN TABABARKA LOO BAAHAN YAHAY IYO/ AMA WAQTIYADA KAMA DAMBAYSTA AH EE SHAHAADADA

Lacag-bixintaada way joogsan doontaa haddii aadan ku dhammaynin shuruudahaaga shahaadada iyo tababarka gudaha wakhtiga loo qabtay. Ma jiraan wakhtiyo lagu darayo wakhtiyadaan xadidan. Waaxda waxaa ay kuu soo diri doontaa ogeysiis ku faraya in aad shaqada joojisid waxaa ayna qaadi doontaa tallaabo ay ku joojinayso lacag-bixinta.

Si aad dib ugu heshid shaqada, ama ugu qaadatid lacagta markale sida daryeel bixiye shaqsi ahaan, waa in aad dhammaysid dhammaan shuruudaha tababarka iyo shahaadada ee loogu talagalay qaybtaada daryeel bixinta shaqsi oo aad adiga iska bixisid kharashka ku baxa.

DIB IN LOO HELO SHAQADII HORE

Haddii aad seegtay waqtiyada kama dambeysta ee tababarkaaga, waa in aad ka dhammaysid tababar kasta oo loo baahan yahay oo haray macalinka bulshada oo adiga qudhaada iska bixi lacagta tababarka. Kooxda Dheefaha SEIU 775 ayaa si ku saleysan kiis-kiis waxaa laga yaabaa in ay tababar u bixiso haddii aad haleeli wayso waqtigaaga kama dambeysta. Waa in aad marto hannaanka oggolaanshaha ee Kooxda Dheefaha SEIU 775. DSHS ma soo farogelin karto arrimaha u dhaxeeya adiga iyo Kooxda Dheefaha SEIU 775 haddii aad seegto waqtiyada kama dambeysta ee tababarka. Waxaa ay u badan tahay haddii aad seegto waqtiyada kama dambeysta tababarka, in aad sidoo kale seegi doonto waqtiga dambeysta ee shahaadadaada. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, fadlan kala xiriir Xarunta Kheyraadka Xubinka lambarkan 1-866-371-3200.

Si aad u heshid liis ay ku qoran yihiin macalimiinta bulshada booqo mareegtada Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Gaboobida ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) oo ah www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/individual-providers kadibna guji “Find a Community Instructor” “Hel Macalin Bulsho”.

Haddii aad seegtay waqtiga kama dambeysta ee shahaadada Kaaliyaha Daryeelka Guriga (HCA), waa in aad qaadid tallaabooyin kasta ee ay u baahan yihiin Waaxda Caafimaadka iyo Prometric kadibna noqo Kaaliye Daryeel Guri (HCA) shahaadaysan.

Marka aad buuxiso shuruudaha dib ugu noqoshada shaqadii hore (tababarka iyo/ama qaadashada shahaadada HCA), la xiriir maareeyaha kiiska ee loo-shaqeeyahaaga qofka kadibna wayddiiso in uu dib kuugu meeleevo sida daryeel bixiye shaqsi (IP). Maareeyaha kiiska wuxuu u baahan doonaa nuqulo ku saabsan shahaadooyinkaaga tababarka ee koorsooyinka laga qaatay meel ka baxsan Kooxda Dheefaha SEIU 775 iyo/ama dokumenti caddaynaya in aad noqotay qof shahaadaysan.

SHURUUDAHA KALKAALIYAHA XILKA LAGU WAREEJIYO

Haddii hawl kasta oo ka mid ah hawlaha kalkaalinta (ay ku jirto ku durida daawada Insuliinta) adiga lagugu wareejinayo iyada oo loo marayo Wareejinta Kalkaaliyaha, waxaad haysataa shuruudo kale oo tababar iyo shahaado dheeraad ah.

Si aad u qabatid hawlaha laguugu wareejiyay waa in aad haysatid mid ka mid ah shahaadooyinkan soo socda:

- Caawiye Kalkaaliye - Diiwaan gashan (NAR)
- Caawiye Kalkaaliye - Shahaadaysan (NAC)
- Kaaliye Daryeel Guri Shahaadaysan (HCA)

IYO

Waa in aad dhammaysid tababarkan:

- Wareejinta Xilka Kalkaaliyaha ee loogu talagalay SHAQOOYINKA Caawiyaasha Kalkaaliyaha.
- Wareejinta Xilka Kalkaaliyaha ee loogu talagalay Caawiyaasha Kalkaaliyaha: Diirada in la Saaro Cudurka Sonkorowga (Haddii ay tahay gudashada durida daawada insuliinta)

SHURUUDAHA WAXBARASHADA JOOGTADA AH

Shaqaalaha daryeelka muddada-dheer intooda badan waxay u baahan doonaan in ay dhammeeyaan 12 saacadood oo Waxbarashada Joogtada ah (CE) sanand kasta kahor inta aan la gaarin maalinta dhallashadooda. Dib-u-eegis ku samee shaxda Qaybaha Daryeel Bixiyaha Shaqsi iyo Shuruudaha Tababarka ee ku qoran boggaga 13-14 si aad u heshid faah-faahin ku saabsan shuruudaha loogu talagalay xaaladaada gaarka ah.

Si aad u heshid Fasallada Sii-wadashada Waxbarashada Joogtada Ah oo ku baxaya Af Ingiriis iyo luuqado kale:

- Booqo mareegtada Kooxda Dheefaha SEIU 775: www.myseiubenefits.org/
- Ka wac Xarunta Kheyraadka Xubinka lambarkan: 1-866-371-3200
- Booqo mareegyada Maamulka Taageerada Muddada-Dheer iyo Gaboobidda ee Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) si aad u heshid macluumaad ku saabsan tababarka loogu talagalay shaqaalaha daryeelka muddada-dheer <https://fortress.wa.gov/dshs/adsaapps/Professional/training/training.aspx>

Shuruudaha Tababarka iyo Qaybaha Daryeel bixiyaha Qofka, Juun 2017

QAYBTA DARYEEL BIXIYAHA QOFKA	JIHEYN IYO AMMAAN		TABABARKA AASAASIGA AH				KAALIYAHA DARYEELKA GURIGA AQOONSIGA		SOCODKA BILOOWGA WAXBARASHO (CE)	WAXBARASHADA JOOGTADA AH (CE)
	Jiheyn 2 Saacdoood	Tababar Ammaan 3 Saacdoood	Tababarka Aasaasiga ah 9 Saacdoood	Tababarka Aasaasiga ah 30 Saacdoood	Tababarka Aasaasiga ah 70 Saacdoood	Fasalka Daryeel bixiyaha Waa'idka 7 saacdoood (Kaliya DDA)	KAALIYAHA DARYEELKA GURIGA AQOONSIGA Loo baahanyahay?	Waxbarasho Joogto ah (CE) 12 Saacdoood	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	
Daryeel Bixiyaha Caadiga ah, qaybta 1: La shacqaalaysiiyay kadib 1/6/2012 shahaadada aqoonsi la aan La shacqaalaysiiyay kadib 1/6/2012	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	La buuxiyay gudaha 120 maalmood oo laga shaqada	Aan loo baahmayn	Haa, gudaha 200 maalmood oo laga joogo bilaabida shaqada	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	
Daryeel Bixiyaha Aasaasiga ah, qaybta 2: La shacqaalaysiiyay kadib 1/6/2012 oonahayta aqoonsi shahaadada kaaliye Daryeel Guri	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Haa, waa in aad haysatid aqoonsigaaga.	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	
Daryeel Bixiyaha Lagareebay qaybta 1: Inta u dhaxaysa 1/1/2011 iyo 1/6/2012, kashaqeyay meel daryeel muud do-dheer iyo dhameeyay shuruudaha talabarka Aasaasiga ah isla waalkhigaasi.	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Maya	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	
Tusaalooyinka kusababshahada meel daryeel kamudda la dhacay waxa ka mid ah bixinta taageerada daryeelka siyo dalka waawayn ama dadda qabta maatooyinka waasoojooga Xarun Nookaansho La caawiyay gobolka karkulka kaysata, Gur Ooyso Qofweyn, Walaalad Daryeel Guri, ama sida daryeel bixiyay qof daryeelka kamudda la dhacay Bulshada ah	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Maya, in tiibalagu hayo xaalad APRN, RN ama LPN, RN ama LPN.	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada adaa dasamaddkeasta.	
Daryeel Bixiyaha Lagareebay, qaybta 2: Leh Kaaliyaha shaqeyay oo ka Diwaan gashan gobolka Washington, Qabte Kaaliye Diwaan gashan Horumarsan, Kaaliye Waxqabta oo Rukhsadayasan, ama aqoonsi Kaaliye Farsamo yaqaan	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Maya, in tiibalagu hayo xaalad wanaagsana qoonsiga APRN, RN ama LPN.	Ku hay shahaadada aqoonsiga APRN, RN ama LPN xaalad wanaagsan.	Ku hay shahaadada aqoonsiga APRN, RN ama LPN xaalad wanaagsan.	
Daryeel Bixiyaha Lagareebay, qaybta 3: Haysta Caawiyay Kaaliyegobolka Washington ah, aqoonsi Shahaadadayasan	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Maya, in tiibalagu hayo xaalad wanaagsana qoonsiga NAC.	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada ee ah aadhammaysid Waxbara shad joogtada ah shaqeyay daryeelka muudda adaa dheer	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada ee ah aadhammaysid Waxbara shad joogtada ah shaqeyay daryeelka muudda adaa dheer	
Daryeel Bixiyaha Lagareebay, qaybta 4: Haysta aqoonsi shad waxbarashada kaaska ah mid aasoo kaahaatay dhinaca kaafiiska kormeeraha Guud ee Waxbarashada Dadweynaha (OSP)	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Aan loo baahmayn	Maya, in tiibalagu hayo xaalad wanaagsan Waxbarashada Khaaska ah.	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada ee ah aadhammaysid Waxbara shad joogtada ah shaqeyay daryeelka muudda adaa dheer	Marka ay tahay ama ka hortaa in khidmad hallashada ee ah aadhammaysid Waxbara shad joogtada ah shaqeyay daryeelka muudda adaa dheer	

Shuruudaha Tababararka iyo Qaybaha Daryeel bixiyaha Qofka, Juun, 2017

QAYBTA DARYEEL BIXIYAHA QOFKA/DARYEEL BIXIYAHALASHA QOMALAYSIIYAY QAYBTA	JIHEYN IYO AMMAAN	TABABARKA AASAASIGA AH	AQOONSI	SOCODKA BILOWGA WAXBARASHO (CE)	WAXBARASHADA JOOGTADA AH		
* Daryeel Bixiyaha Waalidka: Daryeelka qofka uu daryeelo ilmihisa/iimahada ay dhashtay, soo korsaday ama aan dhallin balse waalidkisa qaba.	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	Ku buuxi gudaha 120 maalmood oo laga joogo bilaabida bixinta daryeelka	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn, aan ka ahayn haddii aad si iskaada ah u heshid	Aan loo baahayn, aan ka ahayn haddii aad si iskaada ah u heshid
	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn, aan ka ahayn haddii aad si iskaada ah u heshid	Aan loo baahayn, aan ka ahayn haddii aad si iskaada ah u heshid
* Bixiyaha Waalidka DD: Daryeelka qofka uu daryeelo ilmihisa/iimahada ay dhashtay, soo korsaday ama aan dhallin balse waalidkisa qaba iimahaa oo qaba naafio korin	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn, aan ka ahayn haddii aad si iskaada ah u heshid	Aan loo baahayn, aan ka ahayn haddii aad si iskaada ah u heshid
* Bixiyaha Adeega Xadidan: Siinaya 20 saacadood (ama ka yar) oo daryeel ah bishii hal qof	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn
* Daryeel bixiyaha Iimaha Weyn: Iimaya oo daryeelaya waalidkisa/waalidkeeda dhalay, soo korsaday ama aan dhallin balse qaba waalidkisa kale	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	Ku buuxi gudaha 120 maalmood oo laga joogo bilaabida bixinta daryeelka	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn, aan ka ahayn haddii aad si iskaada ah u heshid	Aan loo baahayn, aan ka ahayn haddii aad si iskaada ah u heshid
** Bixiyaha Kaliya Daryeelka Kumeeleega ah: Siinaya daryeelka dalka (qofka) ee DDA kaliyadaryeelka kumeeleega ah, asagoo shaqaynaya waxayyar 300 saacadood ka badan sanadeedkasta	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	La buuxiyay kahor bixinta daryeelka	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn	Aan loo baahayn

* Haddii aad bedeshid nooca ama lambarka macaamiisha aad sistsid adeega, ama kordhisid tirada saacadaha aad shaqaysid, waxay midaan bedel kartaa qaybaha ah Daryeel bixiyaha Qofka Midaan waxay kordhinaysaa Shuruudahaaga tababararka iyo shahaadada

** Marka DDA-gabxinaya daryeelka kumeeleega ah uu shaqeyo wax ka baddan 300 saacadood mid kamid ah hal sanno oo kalandarka ah, waxay si joogto ah u bedelayaan qaybaha Daryeelbixiyaha Qofka Aasaasiga ah

*** Haddii DDA-ga midkaas oo bixinaya daryeelka kumeeleega ah uu dhaafo xadka 300 saacadood, waxay hayasan doonaan 30 maalmood oo ay ku cusboonaysiiyaan aqoonsiga Kaaliyaha Daryeelka Guriga dhacay.

**** Haddii DDA-ga midkaas oo bixinaya daryeelka kumeeleega ah ee Daryeel bixiyaha Qofka uu dhaafo xadka 300 saacadood, uuna yahay ka Reebida Daryeel bixiyaha Qofka, waxaa khasab ku ah in ay buuxiyaan Shuruudaha Waxbarashada Joogtada ah.

Kusoo dhowoow Guriga Qofka Loogu talagalay Daryeelka sida Daryeel Bixiye Qof Ahaaneed



Welcome to Person Centered Home Care as an Individual Provider

Shuruudaha waafaqsan sharciga:

Waxaa khasab kugu ah in aad dhammysid tababar **75** saacadood ah (Waxaa kamid ah 5 saacadood oo jihayn iyo ammaan ah) **120** maalmood gudahooda ee laga joogo taariikhda aad shaqada biloowday (taariikhda biloowga adeega ee oggolaanshaha) kadibna noqo Kaaliye Daryeel Guri oo Shahaado Haysta (HCA) **200** maalmood gudahooda ee laga joogo xiliga aad shaqada biloowday. Haddii aadan ka soo bixin waqtiyadan kama dambeyska ah, laguma sii siin doono wax lacag ah mana awoodi doontid in aad shaqaysid. Isticmaal jadwalka waqtiga ee loo BAAHANYAHAY iyo liisto-hubineedka si aad uga soo baxdid waqtiyada kama dambeyska ah.

A - Bilaabida

	Tallaabada	Xusuusin	✓
Tallaabada 1	Kahor qandaraaska, waxaa khasab kugu ah in aad buuxisid Foomka Oggolaanshaha Baarista Asalka Gobolka WA . Haddii kale, la xiriir xafiiska aad la samaynaysid qandaraaska.	Hayso nuqul ku saabsan natiijooyinka baarista asalkaaga! Wixii khuseeya macluumaad ku saabsan Baaritaanada Asalka booqo Bogga internetka BCCU .	<input type="checkbox"/>
Tallaabada 2	Haddii aad ku baastid baarista asalka Gobolka WA, xafiiska aad qandaraaska lasamaynaysid ayaa ku siin doona foomka ballanta fara-qaadista ee wata lambarka daba-galka, ee lagu magacaabo Lambarka Aqoonsiga Weydiinta ama Lambarka OCA . Ku qor Lambarkaaga Aqoonsiga Weydiinta/Lambarka OCA halkan: _____	Lambarkaaga Aqoonsiga Weydiinta/Lambarka OCA ayaa loogu baahnaan doonaa ballantaada fara-qaadista IYO Codsigaaga Waaxda Caafimaadka (DOH).	<input type="checkbox"/>
Tallaabada 3	Marka aad heshid foomkaaga ballanta fara-qaadista ee uu la socdo Lambarkaaga Aqoonsiga Weydiinta/Lambarka OCA, isla markiiba ka samee fara-qaadistaada iibiyaha fara-qaadista kuugu dhow. Si aad u samaysatid waqtiga ballanta, booqo Goobaha Fara-qaadista . Ku qor halkan waqtiga ballantaada iyo goobta: _____	Calaamadee kalandarkaaga horena ugu soo qaado foomkaaga fara-qaadista iyo sawir Aqoonsi ah meesha ballantaada! Haddii aadan lagu helin natiijooyinka fara-qaadistaada gudaha 120-maalmood, ma awoodi doontid in aad shaqaysid.	<input type="checkbox"/>
Tallaabada 4	Ka hor inta aadan bixinin daryeel: Uga qaado koorsadaada Tababarka Ammaanka iyo Jihaynta tooska internetka luuqada Ingiriiska halkan SEIU 775 Kooxda Dheefaha . Waxaad u baahnaan doontaa magacaaga koowaad, magacaaga dambe, afarta lambar ee ugu dambeeya ee lambarkaaga dammaanada bulshada si aad u-gelisid cinwaanka iimaylka saxda ah.	Haddii aadan awoodin in aad si toos ah internetka ugu qaadatid koorsada Ingiriiska ee Jihaynta iyo Ammaanka? Doorashooyin baddan ayaa laguugu siin doonaa ballanta aad qandaraaska ku galeyso. Midaan waxaa kamid ah in laguugu soo bandhigo ama laguugu siiyo Jihaynta iyo Ammaanka luuqadahaan soo socda: Ruush, Fiitnaam, Isbaanish, Kooriya iyo Shiinaha La fududeeyay.	<input type="checkbox"/>

B - Buuxi kadibna soo Dir Codsiga DOH

	Tallaabada	Xusuusin	✓
Tallaabada 1	✳ Buuxi kadibna soo dir marka laga joogo 14 maalmood marka aad shaqada biloowdid: DOH. Codsiga HCA . Waxaa lagaaga baahanyahay in aad bixisid ugu yaraan hal cinwaan iimayl ah si laguugula soo xiriir waxyaabaha ku saabsan imtixaankaaga iyo shahaadada laga bixiyo dhinaca DOH iyo shirkada Prometric. Waxaa laguugu soo wargelin doonaa taariikhda imtixaankaaga ee HCA kadibna marka aad soo dirtid codsigaaga DOH oona dhammysid Tababarkaaga Aasaasiga ah ee ah 70 saacadood. Ha bixinin lacagaha, fadlan ku calaamadee 'lacag bixinta gobolka' dusha codsiga kadibna lacagaha waxaa laga bixin doonaa dhanka Kooxda Dheefaha ee SEIU 775.	Haddii aadan kusoo diri codsigaaga gudaha 14 maalmood, waxay u badantahay in aadan awoodi doonin in aad imtixaanka samaysid ama qaadatid shahaado waqtigaaga kama dambaysta ah. Marka DOH ay hesho codsigaaga, waxaa lagu qoondeynayaa lambar shahaadada aqoonsiga DOH oo 10-tiro ah (HM). Isticmaal lambarkan marka aad kala xiriirayso Isuduwaha Shahaadada Aqoonsiga (360) 236-2700 ama marka aad ka helayso macluumaad online-ka ee DOH.	<input type="checkbox"/>

Tallaabada 2	Haddii aad tahay qof luuqadiisa Ingiriiska ay tahay mid xadidan (LEP), macnaheedu tahay in awoodaada akhriska, qoraalka iyo ku hadalka aad ku hadashid luuqada Ingiriiska ay tahay mid xadidan, waxaad xaq u yeelan kartaa shahaado dheeraad ku meel gaar ah oo ah 60-maalmood. Fadlan xusuusnoow marka aad dheeraysid waqtiga loogu talagalay shahaadada, in aysan midaan dheeraynaynin waqtiga kama dambaysta ah ee tababarkaaga.	KALIYA LEP: Ku calaamadee codsigaaga DOH in aad doonayso shahaadada ku meelgaarka ah midaana waxay kuu oggolaanaysaa in ay ku siiso waqti baddan oo aad uga soo baxdo tallaabadahan.	<input type="checkbox"/>
Tallaabada 3	Si aad ugu qaadatid imtixaanka Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) luuqadaha Isbaanish, Ruush, Fitnaam, Kooriyan, Shiinaha, Kambodiyani, Laoshiyan, Samowan, Soomaali, Yukreeniyani, Tagalog, Amhaaro, ama Carabi ka dooro/ku calaamadee luuqada aad doonaysid Codsiga Imtixaanka Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA). Haddii aad doonayso in aad ku qaadato imtixaanka luuqad aanaan ku jirin liiska, waxaad codsan kartaa shakhsi kuugu turjumo luuqadaada adiga oo dhammeystiraya xirmada codsiga diyaafadinta imtixaanidda mareegtada shirkada Prometric kadibna u soo gudbinaya cinwaanka ku yaalla foomkan. Fadlan ka fiiri macluumaadkaasi halkan: Xirmada Codsiga Diyaafadinta Imtixaanka Kaaliyaha Daryeelka Guriga	Waxa ay qaadan karaan codsiyada diyaafadinta/ turjumaanka 30 maalmood. DOH waxay soo diri doontaa ii-mayl. Waxaa khasab kugu ah in aad ka jawaabtid si aad u xaqiijisid. Haddii aadan ka jawaabin iimaylkan, codsigaaga waxaa laga dhigi doonaa mid aanaan la dhammaynin. Ka eeg Sanduuqa (Inbox) iimaylka, galalka Junk iyo Spam maalin kasta iimayl ka yimid DOH iyo shirkada Prometric kadib marka aad dhammeysato tababarkaaga!	<input type="checkbox"/>

C - Isku qor Tababarka ah Tooska SEIU 775 Kooxda Dheefaha

	Tallaabada	Xusuusin	✓
Tallaabada 1	✳️ Isku diiwaan geli marka laga joogo 14 maalmood marka aad shaqada biloowday: Iska diiwaan geli tababarka aasaasiga ah ee ah 70 saacadood tooska NW Iskaashiga Tababarka (TP) bogga internetka halkan https://www.myseiubenefits.org/	Aadan awoodin in aad hesho Internet? Kasoo wac Xarunta Xogta Xubinka (MRC) lambarkan 1-866-371-3200.	<input type="checkbox"/>
Tallaabada 2	✳️ Lagu taliyey 60 maalmood oo laga joogo marka aad shaqada bilowday: Dhammee tababarkaaga aasaasiga ah ee soconaya 70 saacadood isla markiiba si aad u hubiso in aad hesho fasallo ku yaalla goobta aad ku nooshahay iyo waqtiga loo baahan yahay si aad uga soo baxdo waqtiyada kama dambeyska ee imtixaanidda iyo shahaado-siinta.	Tooska mareegtada Dheefahayga waxaad ka heli kartaa Shahaadada loogu talagalay Dhammaynta kadib 75 saacadood oo tababarka la dhammeeyay ah. Kooxda Dheefaha ee SEIU 775 ayaa kadib ugu sii diraysa dhinaca Waaxda Caafimaadka (DOH) adiga magacaaga.	<input type="checkbox"/>
Tallaabada 3	Ku qor taariikhda tababarka iyo goobta halkan: _____	Calaamadee kalandarkaaga!	<input type="checkbox"/>

D - Imtixaanka Tooska Shirkada Prometric

	Tallaabada	Xusuusin	✓
Tallaabada 1	Ka gudub imtixaanka xirfadaha iyo aqoonta qoran: Ku qor halkan taariikhda iyo meesha imtixaanka: _____ Qaado waqtiga imtixaanka koowaad ee lagaaga soo jeediyo dhinaca shirkada Prometric. Imtixaanka qaado waqti u dhow dhammaadka tababarka si aad u kordhiso awoodaada ka gudbidda/najaxidda imtixaanka. Raadi ii-mayl ka yimid Pbt-admit@Prometric.com oo ku qoran macluumaadka imtixaanka, magacaaga, Lambarka Aqoonsiga Prometric xariiqa mawduuca (Fiiri galalka Inbox, Junk iyo Spam).	Shirkadda Prometric waxa ay keliya kula soo hadlaysaa iyada oo adeegsanaysa cinwaanka ii-mayl ee aad ku bixiso codsigaaga DOH booska iimaylka loo baahanyahay. Haddii aaddan helin taariikh imtixaan oo iimayl ay kuugu soo dirtay shirkadda Prometric 14-28 maalmood gudahooda ee kadib marka aad dhammeeyso tababarka, kala xiriir shirkadda Prometric lambarkan 1-800-324-4689. Haddii aad u baahantahay cusboonaysiin tababarka ah ama caawimaad, fadlan lasoo xiriir MRC si aad u heshid caawimaad ama booqo: SEIU 775 DOH Tallaabadaha lagu Helo Shahaadada	<input type="checkbox"/>

Tallaabada 2	<p>Haddii aad ku dhacdid imtixaanka, si degdeg ah markale jadwal u samayso. Si degdeg ah ula xiriir shirkadda Prometric si imtixaan mar kale lagaaga qaado.</p> <p>Waxaad qaadan kartaa qaybta aad ku dhacday ee imtixaanka laba jeer oo kale.</p> <p>Waa in aad bixisaa lacag imtixaan kasta oo aad-ku celisid.</p>	<p>Macluumaadka ku saabsan lambarka shahaadadaada waxaa laga helayaa bogga internetka ee DOH: Baaritaanka Shahaadada Aqoonsiga Bixiyaha (HM ama PV).</p> <p>Marka shahaadadaada aqoonsiga ay sheegayso “Hawlgal ah” waxaad awood u leedahay in aad shaqaysid. Ma awoodid in aad shaqayso 200 maalmood in ka badan adiga oo aanan ka ahayn Hawlgal ah mareegtada DOH.</p>	<input type="checkbox"/>
-----------------	--	--	--------------------------

Wakaalada	Teleefoonka iyo Faakiska	Cinwaanka Boostada	Ii-maylka/Mareegtada
Waaxda Caafimaadka (DOH)	Iskuduwaha Shahaadada Aqoonsashada Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA) (360) 236-2700 Adeegga Macamiilka Waaxda Caafimaadka (DOH) (360) 236-4700	Codsiga ugu dir: (Haku darin lacagta) DOH - Home Care Aide Credentialing P.O. Box 1099 Olympia, WA 98507-1099 Ku soo dir dukumeentiyada kale ee <u>AANAN</u> lala soo dirin codsigii hore: DOH - Home Care Aide Credentialing P.O. Box 47877 Olympia, WA 98504-7877	Mareegtada Waaxda Caafimaadka (DOH): Home Care Aide Soo-dejiso Buugyaraha Macluumaadka (14 luuqadood) si uu kuugu caawiyo in uu kaaga jawaabo su'aalahaaga.
Shirkada imtixaanka Prometric	Taleefoon: 1-800-324-4689	Cinwaanka Shirkadda Prometric: Attention: Washington Home Care Aide Program 7941 Corporate Dr. Nottingham, MD 21236	Iimaylka Shirkada Prometric: WAHCA@prometric.com Mareegtada Shirkadda Prometric: Shirkada Prometric

Linkiyada Dhakhsaha ah ee Maamulka Daryeelka Caafimaadka (HCA): Ka raadi linkiyada hal meel oo halkan ah [Linkiyada Dhakhsaha ah ee Tababarka Kaaliyaha Daryeelka Guriga](#)



LACAG HELIDDA

HORUDHACA PROVIDERONE EE SHAQSIGA (IPOne)

ProviderOne ee Shaqsiga (IPOne), waa nidaamka aad u isticmaalaysid in aad ku sheegatid adeegyada daryeel bixiyaha shaqsiga oo aadna ku qaadatid jeegga lacag bixinta. IPOne waxaa joogteeya Iskaashatada Dadweynaha LLC (PPL).

Si lagu siiyo lacag-bixintaada waa in aad ku qortaa saacadaha aad shaqaysay, hawlaha aad qabatay, iyo masaafada safarka (haddii ay jirto) warqada wakhtiga maalin kasta oo aad daryeel bixisid kadibna u soo gudbi warqada wakhtiga IPOne. Waxaad u soo gudbin kartaa xaashidaada waqtiga isaga oo elektaroonig ah adiga oo IPOne u soo marsiinaya boggan: <https://ipone.publicpartnerships.com/login.aspx>. Sidoo kale waxaad haysataa doorasho ah in aad ku soo dirtid warqada wakhtiga fakis ama boosto. Si aad isaga diiwaangelisid oo aad u isticmaashid IPOne:

- Booqo www.ipone.org
- Guji batoonka BetterOnline™ korkiisa
- Guji batoonka 'Sign Up' 'Isdiiwaangeli' kadibna ka jawaab su'aalaha amniga ah

Si aad u hesho lacag-bixintaada waa in aad u soo gudbisid saacadaha aad shaqaysay, hawlaha aad qabatay, iyo masaafada safarka IPOne.

Si aad u hesho lacag-bixintaada waa in aad u soo gudbisid saacadaha aad shaqaysay, hawlaha aad qabatay, iyo masaafada safarka IPOne.

Kheyraadka kugu Caawinaya In aad Icticmaashid IPOne

Waxaad heli doontaa xirmo soo dhoweyn ah oo kuugu timaada boostadaada marka aad koow biloowdid in aad u shaqayso sida daryeel bixiyaha shaqi ahaaneed. Xirmada soo dhoweyntu waxaa ay ka mid noqon doona foom ku qoran macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed oo IPOne ay ka heshay DSHS. Waa in aad dib-u-eeqto macluumaadkan si aad isaga habsatid in uu saxan yahay. Haddii macluumaadka uusan sax ahayn, cusboonaysii adiga oo online-ka galaya kadib marka aad isku diiwaangeliso ii aad u isticmaasho IPOne, ama adiga oo ka wacaya xarunta telefoonnada IPOne lambarkan 844-240-1526 si aad u hesho caawimaadda sameynta isbedellada.

Sidoo kale waxaad ka heli doontaa xirmo tababar ka IPOne marka aad koow biloowdid in aad u shaqayso sida daryeel bixiye shaqsi cusub ahaan. Xirmadan waxaa ku qoran macluumaad kugu caawin doona in aad fahantid sida loo isticmaalo IPOne.

Hadaad ranto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo isticmaalo IPOne, booqo mareegtada IPOne oo ah www.publicpartnerships.com/programs/washington/IPOne/index.html

Waxaad soo dejisan kartaa Buugga Tababarka IPOne ee dhammeystiran ama eeg qaybta gaarka ku ah baahiyadaada. Mowduucyada macluumaadka Tababarka Online-ka ee IPOne ee loogu hadlay macluumaadka tababarka online-ka iyo midka qoran ee IPOne waxaa ka mid ah:

- Sida loo sameeyo koontada isticmaalaha
- Sida loo sameeyo dookha lacag-bixinta (samenta lacag dhigista tooska ah)
- Sida loo cusboonaysiiyo oo loo xaqiijiyo macluumaadka canshuurta
- Sida loo beddelo ama loo cusboonaysiiyo erar-sireedka ama password-ka IPOne
- Sida loo eego macluumaadka oggolaanshaha
- Sida loo gudbiyo warqada wakhtiga (waxaa ka mid ah sida loo soo gudbiyo magdhowga masaafada safarka iyo wakhtiga fasaxa ah ee lacagtiisa la bixiyo iyo tababarka sii-wadashada waxbarashada)
- Talooyinka iyo Tusmooyinka soo gudbinta warqadda wakhtiga
- Sida isbeddelo loogu sameeyo warqad wakhti oo hore lacagteeda loo bixiyay
- Sida loo raadiyo macluumaadka lacag-bixinta
- Qofka lagala xiriiro su'aalaha

Warqada Oggolaanshaha ProviderOne Shaqsiga

IPOne ayaa warqad oggolaansho boosto kuugu soo diri doonta marka:

- Adeegyada loogu talagalay loo-shaqeeyahaaga marka hore la oggolaado
- Ay jiraan wax isbedelo ah oo saameynaya oggolaanshaha

Sidoo kale waxaad ka daalacan kartaa isla macluumaadka oggolaanshaha internetka adiga oo gala koontadaada IPOne. Akhri xirmadaada tababarkaaga IPOne si aad u barato sida arintan loo sameeyo.

Soo sheegida Isbedallada

Haddii uu jiro isbeddel ku yimid magacaaga, cinwaankaaga, ama koontadaada bangiga waxaad u baahan doontaa in aad la xiriirtid IPOne. Waxaad ku soo sheegi kartaa isbedellada ku yimaada lambarkaaga teleefoonka, cinwaankaaga, ama koontadaada bangiga internetka adiga oo u soo marsiinaya bogga internetka IPOne. Si aad usoo sheegtid isbedelada ku dhaca magacaaga, taariikhda dhallashada, ama lambarkaaga dammaanada bulshada waxaa khasab kugu ah in aad wacdid xarunta wicitaanka adeega macamiilka.

Xarunta Wicitaanka Adeegga Macamiilka ee IPOne

844-240-1526

SAACADAHA WAKHTIGA FASAXA AH EE LACAGTOODA LA BIXIYO (PTO)

Waxaad kasban kartaa wakhtiga fasaxa lacagta ah si aad ugu isticmaashid qaab kasta oo aad dooratid. Hadaad rabto macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan inta ay le'eg yihiin saacadaha wakhtiga fasaxa ah ee lacagtooda la bixiyo ee aad kasban karto eeg heshiis wadarreedka gorgortanka ururka shaqaalaha ee SEIU 775 oo laga heli karo bartan internetka: www.ofm.wa.gov/labor/agreements.

Isticmaalida Saacadahaaga Wakhtiga Fasaxa ah ee Lacagtooda La Bixiyo

Waxaad dooran kartaa in aad u isticmaashid saacadaha wakhtiga fasaxa ah ee lacagtooda la bixiyo si aad fasax uga qaadatid shaqada ama in aad lacag ka dhigatid adiga oo aan fasax qaadanin. Haddii aad doonaysid in aad fasax qaadatid adiga oo isticmaalaya saacadahaaga wakhtiga fasaxa ah, waxaa khasab kugu ah:

- In aad ku wargelisid oo aadna fasax ka heshid loo-shaqeeyahaaga ugu yaraan laba todobaad ka hor inta aadan qaadan wakhtiga fasaxa ah.
- U sheeg Maareeyaha Kiiska ee loo-shaqeeyahaaga/Shaqaalaha Bulshada sidaa darteed isaga ama iyada ayaa kugu caawin kara hubinta in Qorshaha Daryeelka la raaco inta aad maqan tahay.

Goormee la lumin karaa Saacadaha Wakhtiga Fasaxa ah ee Lacagtooda La Bixiyo

Haddii aad gaartid saacadaha wakhtiga fasaxa ah isku soo ururay ee la oggol yahay ee ugu badan, ma kasban doontid ama kuuma ururi doonaan saacado wakhti fasax kale oo lacaghooda la bixiyo ilaa baaqiga uu ka hoos maro qaddarka ugu badan ee la oggol yahay. Saacado kasta oo la aruuriyo waa kuwo lumay. Fadlan ka eeg heshiis wadarreedka gorgortanka ee hadda saacadaha wakhtiga fasax lacaghooda la bixiyo ee la oggol yahay in ay ururaan.



SAACADAHA TABABARKA

Saacadaha tababarku waa wakhtiga lagu qaato fasal ayada oo la dhammaynayo tababarka loo baahan yahay si loogu shaqeeyo sida daryeel bixiyaha shaqsi. Isbeddelo ayaa lagu sameeyay sida ay daryeel bixiyayaasha shaqsi ay u sheegan karaan xaqooda oo lacag loogu siiyo dhammeysashada saacadaha tababarka ee loo baahan yahay.

Sidee loo sheegtaa lacag bixinta tababarka

Lacag bixinta loogu talagalay wakhtiga lagu qaatay tababarka waa mid ku salaysan taariikhda uu dhacay. Waxaa lagaa dooni doonaa in aad sheegatid saacadaha tababarka ee aad dhammeysay maalin kastoo ka mid ah todobaadka shaqada ee uu tababarku dhacay, isla qaabka aad u sheegatid wakhtigaaga adeegga. Todobaadka shaqadu wuxuu bilaabmayaa marka ay tahay 12:00 duhurnimo maalinta Axada wuxuuna dhammaanayaa Sabtida ku xigta marka ay tahay 11:59 habbeenimo.

Todobaadka shaqadu wuxuu bilaabmayaa marka ay tahay 12:00 duhurnimo maalinta Axada wuxuuna dhammaanayaa Sabtida ku xigta marka ay tahay 11:59 habbeenimo.

LACAGTA LA BIXIYO WAKHTIGA DHEERAADKA AH IYO XADKA TODOBAADKA SHAQADA

Markii ay ahayd 3da Abriil, 2016 Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) waxaa ay bilowday xisaabinta lacag-bixinta dheeraadka ah ee loogu talagalay daryeel bixiyayaasha shaqsi ah marka ay shaqeeyaan wax ka badan 40 saacadood todobaadka shaqada. Lacag-bixinta dheeraadka ah waa 1.5 jeer oo sicirka lacagtaada joogtada ah.

Kheyraadka loogu talagalay Waqtiga Dheeraadka ah ee IP www.dshs.wa.gov/altsa/IPOT

Todobaadka shaqada wuxuu bilaabanayaa 12:00 duhurnimo maalinta Axada wuxuuna dhammaanayaa 11:59 habbeenimo maalinta Sabtida.

Todobaadka shaqada wuxuu gudbi karaa mudooyinka lacag bixinta iyo bilaha kaalandarka. Hoos ka eeg tusaale/sawir.

Sunday	Monday	Tuesday	Wednesday	Thursday	Friday	Saturday	
15 6	July 16 6	17 6	18 6	19 6	20 5	21 5	THIS WEEK CROSSES 2 PAY PERIODS → 40
22 5	23 5	24 6	25 6	26 6	27 6	28 6	
July 29 5	30 5	31 6	Aug 1 6	2 6	3 6	4 6	THIS WEEK CROSSES 2 MONTHS AND 2 PAY PERIODS → 40

Xaqiiqooyinka Xadka Todobaadka Shaqada

- Xadka todobaadka shaqada waa lambarka guud ee saacadaha adeegga aad ku bixin kartid todobaadka shaqada.
- Xadka todobaadkaaga shaqadu waa 40 saacadood oo adeeg ah todobaadkii haddii adiga lagu qoondeeyo xad todobaad shaqo aad u sareeya mooyaane ama oggolaansho ku meel-gaar ah ay ku siiso Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS).
- Haddii ay oggolaato Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) mooyaane, ma shaqeyn kartid saacado badan marka loo eego inta xadka todobaadka shaqada.

Saacadaha adeegga waxaa loo xisaabaa dhinaca xadka todobaadka shaqada. Saacadaha adeegga waa wakhtiga lagu qaatay bixinta:

- daryeelka shakhsi
- daryeelka gargaarka
- tababarka barashada xirfadaha
- adeegyada daryeelka ku-meelgaarka ah

Isku duwida Xadka Todobaadka Shaqada leh Saacadaha la Qoondeeyay

IPs waa in aysan shaqeyn in ka badan xadka toddobaadka shaqada ee loo qoondeeyay sidoo kale waa in aysan u shaqeyn macmiil saacado ka badan inta loo qoondeeyay bisha.

Waa mas'uuliyadaada in aad isku dheelitirto tirada saacadaha adiga lagaaga qoondeeyay dhinaca qof kasta oo aad daryeel siisid ee leh isla xadka todobaadka shaqada lagaaga qoondeeyay dhinaca Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS).

Adigu ma aqbali kartid hawlaha shaqada ee kuu keeni kara in aad:

- Shaqaysid wax ka badan xadka todobaadkaaga shaqada
- U safartid wax ka badan 60 daqiiqo inta u dhaxaysa meelaha shaqada xaqa ah; ama
- Ku sheegatid wax ka badan 7 saacadood oo wakhtiga safar xaqa ah ee todobaadka shaqada.

Dabacsanaanta xadka toddobaadka shaqada ee IPs leh Xadka Toddobaadka Shaqada oo 40.25 Saacadood ah iyo in ka badan

Haddii ay oggolaato Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS) mooyaane, ma shaqeyn kartid saacado badan marka loo eego inta xadka todobaadka shaqada.

Xaalado gaar ah marka lagu jiro, macmiilkaaga wuxuu awoodi karaa in uu u wareejiyo saacadahaaga todobaadka shaqada inta u dhaxaysa todobaadyada gudaha hal bil haddii dhammaan afartaan shay soo socota ay sax yihiin:

- 1) Waxaa jirta baahi gaar ah oo loogu talagalay wax ka badan afar saacadood ee todobaadka la bixiyay ah
- 2) Adigu aan shaqayn doontin in ka baddan saacadaha macamiilka ee bilaha ah
- 3) Isticmaalida saacado badan oo adeeg ah oo lagu isticmaalo hal todobaad gudahiisa aysan sababi doonin in macamiilka uu waayo daryeel aasaasi ah todobaadyada kale ee bisha
- 4) Adigu shaqayn doonin saacado badan oo dheeraad ah bisha kuwaas oo ka badan saacadaha aad heli lahayd haddii aad shaqayn lahayd saacado siman inta lagu guda jiro bisha.

Haddii uu macmiilkaagu yahay kaqayb qaate ku jira Xoriyada Cusub ama Adeegaha Guriga Halyeyga Hore ee La agaasimay, waxaa dhici karta in ay u qalmaan in uu iibsado saacadaha ka baddan xadka todobaadka shaqada. Wixii ku saabsan macluumaad dheeraad ah, macmiilkaaga wuxuu u baahnaan doonaa in uu la xariiro lataliyahooda daryeelka.

In aad aadid xadka todobaadkaaga shaqada si aad uga hortagtid khatarada ammaanka iyo caafimaadka ku dhici kara macamiilka

Haddii aad shaqaysay dhammaan saacadaha ku jira todobaadkaaga shaqada oo u baahan tahay in aad la joogtid macamiilka sabab khatar caafimaadka ama ammaanka macamiilka ah darteeda, qaad tallaabooyinkan soo socda:

- a. La joog macamiilka ilaa ay xaaladu ka noqoto mid ammaan ah oo degan.
- b. Haddii ay jirto xaalad deg-deg ah oo u baahan adeegyo caafimaad deg-deg ah, wac 9-1-1.
- c. Ku caawi macamiilka in uu diyaarsado caawimo gurmada ah.
- d. Dhammee maalintaada shaqada sida ugu dhakhsiyaha badan ee ay ammaan tahay in aad sidaa samaysid.
- e. La xiriir maareeyaha kiiska macmiilkaaga maalinta shaqada ee xigta si aad arinta ugu sharaxdid.

Waa mas'uuliyadaada in aad u qorshaysatid jadwalkaaga shaqada ee dadka aad u shaqaysid iyo in aad iska hubso in aadan dhaafin xadkaaga todobaadka shaqada ama wakhtiga safarka la oggolaaday.

WAKHTIGA SAFARKA

Tan iyo 1da Abriil, 2016, Daryeel Bixiyayaasha Shaqsiga ah (IPs) waxaa lacago lagu siinayay wakhtiga safarka. Wakhtiga safarku waa marka aad ka tagtid hal meel shaqo oona aadid meel kale isla maalintii. Wakhtiga safarka ma ahan mid lagu xisaabay xadkaaga saacada adeegga shaqada.

Wakhtiga safarka waxaa ka mid ah:

- Wakhti safar tooska ee hal-waddo ah, laga bilaabo hal goobta shaqo laguna aado mid kale, marka labada meel ee shaqaba ay yihiin kuwo ku yaala isla meesha aad degan tahay.
- Wakhtiga safarka tooska ah ee u dhaxeeya goobta shaqada iyo goobta tababarka ee uu baraha horseedka ka yahay looga qayb qaadanayo tababarka loo baahan yahay, marka goobta shaqadu ay tahay meel ka baxsan meesha aad degan tahay.

Goobta shaqadu waa:

- Meesha aad ku siisid daryeelka la oggolaaday macamiilka Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada (DSHS).
- Meesha aad ugu tagtid tababarka loo baahan yahay

Wakhtiga safarku ma ahan:

- Safar laga soo safro gurigaaga laguna aado goobta shaqada ama goobta tababarka.
- Safar laga soo safro goobta shaqada ama goobta tababarka laguna aado gurigaaga.
- Safar laga soo safro hawl shakhsiyeed laguna aado goobta shaqada ama goobta tababarka.

Safarka u dhaxeeya gurigaaga iyo goobta shaqada, xitaa haddii aad la nooshahay qof aad siisid daryeel, waxaa loo tixgeliyo wakhti safar shaqo maalin le ah oo loo bixin karin sida wakhti safar.

Wakhtiga safarka la oggolaaday, saacadaha tababarka loo baahan yahay iyo wakhtiga fasaxa ee lacagtiisa la bixiyo laguma daro xadka todobaadka shaqada.

Foomamka codsiga safarka waxaa laga heli karaa maareeyaha kiiska ee loo-shaqeeyahaaga.

Sidee loo sheegtaa wakhtiga safarka

Si aad u sheegatid wakhti safar, u soo dir foom codsi wakhti safar oo buuxa dhinaca maareeyaha kiiska ee loo shaqeeyahaaga. Haddii ay suurto gatahay, soo dir foomkan kahor inta uusan dhicin wakhtiga safarka. Haddii aad leedahay wax kasta oo wakhti safar aan qorsheysnayn, waxaa khasab kugu ah in aad ula xiriirtid sida ugu dhakhsiyaha baddan maareeyaha kiiska loo-shaqeeyahaaga una soo dirtid sida ugu dhakhsiyaha badan foomka codsiga wakhtiga safarka.

Maareeyaha kiiska macamiilka wuxuu oggolaan doonaa lacag bixinta loogu talagalay wakhtiga safarka. Oggolaanshaha loogu talagalay wakhtiga safarka loo qalmo ma ahan doono mid ka badan:

- 60 daqiiqo oo ah inta u dhaxaysa goobaha shaqada ee u qalma; ama
- 7 saacadood oo todobaadka shaqada ah.

Waxaa khasab kugu ah in aad ku sheegatid wakhtigaaga safarka gudaha nidaamka IPO ee ku salaysan taariikhda uu safarku dhacay. Waxaad sheegan kartaa adiga oo ku qora wakhtiga bogga internetka IPO ama adiga oo ku qora warqada wakhtiga.

Sheegashada xad-dhaafka ah iyo ficilada qandaraaska

Haddii aad u oggolaatid hawlo ama saacado shaqo si keenaysa...

- wakhtiga dheeraadka ee xad-dhaafka ah
shaqaynta in ka badan saacadaha macamiilka ee bilaha ah
- dhaafidda xadka safarkaaga ee la oggol yahay adiga oo aan oggolaansho ka haysan waaxda (eeg bogga 22aad)

...waxaad heli kartaa tallaabo qandaraas. Kadib saddex tallaabooyin qandaraas xiriir la leh isticmaalid wakhti dheeraad ah, qandaraaskaaga waxaa dhici karta in la joojiyo. Haddii ay midaan dhacdo, waxaa khasab kugu ah in aad sugtid 90-maalmo si aad dib ugu codsatid qandaraas cusub. Haddii aad u dhaaftid si wayn ama si soo noqnoqota todobaadka shaqadaada ama xadadka wakhtiga safarka adigu ma awoodi kartid in dib laguula galo qandaraas Daryeel bixiyaha Shaqsigaa ahaan.

Ma heli doontid tallaabooyin qandaraas oo loogu talagalay in la shaqeeyo wax ka badan xadkaaga shaqada todobaadka ee loogu talagalay:

- Tababarka DSHS ee loo baahan yahay
- Wakhtiga Safarka La oggolaaday
- Wakhtiga Maamuleed
- Waqtiga Fasaxa ah ee Lacagtiisa La Bixiyo (PTO)

Sideen uga fogaan karaa tallaabooyin qandaraas?

- Had iyo jeer waqti hore qorsheyso jadwalka shaqadaada ka-dibna meel ku qoro.
- Haddii baahiyada macmiilka ay isbeddelaan oo ay tahay in aad ku shaqeyso jadwal kale oo saameynaya xadkaaga shaqada todobaadka, si deg-deg ah ula xiriir maareeyaha kiiska macamiilka.
- Ku diiwaangeli wakhtigaaga shaqada xaashidaada waqtiga kadib maalin kasta ee aad shaqeyso, waxaa sidoo kale ku caawinaya in aad ku diiwaangeliso waraaq kaalandar ah. Inta badan fiiri si aad u hubiso in aad ku jirtid gudaha xadkaaga shaqada ee todobaadka.
- DSHS waxa ay leedahay kheyraad la heli karo oo ku caawinaya adiga iyo loo-shaqeeyahaaga/macamiilkaaga in aad wax badan ka ogaatiin maareynta jadwalkaaga si aad ugu sugnaatid gudaha xadkaaga shaqada todobaadka. Kheyraadkan waxaa laga heli karaa boggaan internetka ah www.dshs.wa.gov/altsa/IPOT.

In intee le'eg ayay tallaabooyinka qandaraaska ku jiri karaan faylkeyga qandaraaska?

Tallaabo qandaraas kasta waxaa ay furnaanaysaa muddo ah 12 bilood laga bilaabo taariikhda ku qoran dusha oggaysiiska tallaabada qandaraaska. Kadib 12 bilood, tallaabada qandaraaska waa la xirayaa.

Bisha lagu sheegay tallaabada qandaraaska ama warqada la helay, waa bisha lagu siiyay lacag-bixinta saacadaha aad sheegatay:

- Tusaale ahaan, haddii waraaqdu ay sheegayso, “Tallaabada qandaraaska waxaa loogu talagalay saacadaha la bixiyay bisha Abriil,” tani macanaheedu waa in bishii Abriil lacagahii aad sheegatay lagu siiyay ee laga yaabo in aad soo shaqaysay bisha ka horeysay (Maarso).
- La xiriir maareeyaha kiiska haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan bisha aad ku sheegatay xaqsheega dheeraadka ah.



LACAGTA MAGDHOWGA SAFARKA AMA MASAAFADA

Magdhowga safarka ama masaafada waa mid ka duwan wakhtiga safarka. Magdhowga safarka ama masaafada macnihiisu waxay tahay in lacag laguugu siiyo masaafada aad gaarigaaga shakhsiyeed u wadid si aad u samaysid dukaamaysiga aasaasiga ah ee loogu talagalay loo-shaqeeyahaaga ama ugu wadid loo-shaqeeyahaaga adeegyo caafimaad.

- Si aad u heshid magdhowga safarka ama masaafada, dukaamaysiga aasaasiga ah ama gaadiidka lagu aado adeegyada caafimaadka waa in uu noqdaa qayb ka mid ah Qorshahaaga Daryeelka Loo-shaqeeyahaaga.
- Sicirada magdhowga safarka ama masaafada waxaa loo samayn karaa ilaa 100 mayl oo hal bil gudaheeda ah ee loo-shaqeeye kasta.
- Haddii aad dooratid in aad macamiisha ku qaadid gaarigaaga, waa in aad haysatid shatiga darawalka Gobolka hadda ah/shaqeynaya iyo caymis gaari sida loogu baahan yahay sharciga gobolka.

Iyada oo ku xiran maaliyadsiinta barnaamijka daryeelka macamiilka DSHS, qaar ka mid ah daryeel bixiyayaasha shaqsiga waxaa dhici karta in loo magdhowo masafooyinka dheeraadka ah ee bixinta gaadiidka kale. Baahiyada gaadiidka dheeraadka ah, sida in qofka loo shaqeeyo loo wado shaqada, waa in si cad loogu qeexaa Qorshaha Daryeelka loona qoondeeyo daryeel bixiyaha shaqsiga (IP). Xaaladdan kaliya, daryeel bixiyaha shaqsiga ayaan dhici karta in looga magdhowo safarka dheeraadka ah ilaa qaddarka uu ku oggolaaday maareeyaha kiiska Qorshaha Daryeelka.

KORDHINTA LACAG-BIXINTA IYO MUSHAARKA

Sicirka saacadlaha aasaasiga ah ee Daryeel Bixiyayaasha Shaqsiga (IPs) waa si waafaqsan heshiis wadarreedka gorgortanka ee ay ku gorgortameen DSHS iyo SEIU 775. Laga soo bilaabo 1da Jannaayo, 2019, sicirka saacadlaha wuxuu ka bilaabayanaa \$15.00 iyada oo kordhintana ay ku xiran tahay isugeynta saacadaha shaqada. Sicirrada saacadlaha ah ee qaybta lixdii bilood ee ugu dambeeyay ee muddada gorgortanka 2017-19 waxaa lagu muujiyay jadwalka mushaarka, ee loogu talagalay 1da Jannaayo, 2019 – 30ka Juun, 2019. Jadwaladan waxaa lagu daabacay Lifaafa A ee heshiis wadarreedka Gorgortanka ee lagu soo daabacay mareegtada Xafiiska Maareynta Maaliyadeed ee ku yaalla: www.ofm.wa.gov/state-human-resources/labor-relations/collective-bargaining-agreements. Mushaaraadka mustaqbalka waxaa loo daabici doonaa sida qayb ka mid ah heshiisyada mustaqbalka.

Qaar ka mid ah daryeel bixiyayaasha shaqsiga waxay u qalmi doonaan shahaado iyo/ama lacag-bixinta kala duwanaanta tababarka horumarsan sida ku xusan Heshiis Wadarreedka Gorgortanka marka ay kasoo baxaan shuruudaha qaar ee shahaadada ama ka reebnaanta.

Canshuuraha iyo Waxyaabaha Laga Jaro Jeega Lacag-bixinta

CANSHUURTA DAKHLIGA EE FEDERAALKA

Buuxi ka-dibna soo gudbi foomka canshuurta W-4 sidaa darteed canshuuraha dakhliga federaalka saxa ah ayaa laga dhigi doonaa jeega lacag-bixinta. Haddii aad doorato in aadan soo gudbin foomka canshuurta W-4, xaaladaada xareynta canshuurta waxaa ay si toos ah u noqon doontaa Gunnooyin “Hal” leh “0”. Tani waa heerka ugu sarreeya ee canshuur ka dhigidda waxaanna qaddarka ugu badan ee cashuuraha laga jari doonaa lacag-bixintaada.

Haddii aad doonaysid qaddar dheeraad ah oo ah Canshuurta Dakhliga Federaalka in laga jaro jeegaaga lacag-bixinta, waa in aad buuxisid, saxiixdid kadibna aad soo gudbisid foomka W-4 oo tilmaamaya qaddarka Canshuurta Dakhliga Federaalka ee dheeraadka ah ay tahay in laga gooyo jeegaaga lacag-bixinta.

Haddii aad sheegato ka-facinta ka dhigidda (“Ka-reeban”), ka-reebnaantaada ama ka cafintaada sannadka hadda waxaa ay dhaceysaa 15ka Febraayo ee sannadka soo socda. Waa in aad soo gudbisid foom cusub sannad kasta si aad u sii ahaatid (“Ka-reeban”). Haddii aadan soo gudbin foomka W-4, xaaladaada xareynta canshuurta waxaa ay si toos ah u noqon doontaa Gunnooyin “Hal” leh “0”.

Waxaad ku soo celin kartaa foomka la buuxiyay ee la saxiixay:

- Iimayl ugu soo dir IPOne iimaylkan pplwaipone-cs@pcgus.com
- Fakis ugu soo dir IPOne lambarkan 1-855-901-6904

Xusuusnoow: Fadlan diiwaannadaada ahaan u hayso nuqulka foomka W-4 ee aad gudbiso

Gudbinta foomka W-4

Waxaad heli kartaa foomka IRS W-4 adiga oo:

- Foomka ka soo dejisanaaya mareegtada IRS www.irs.gov/pub/irs-pdf/fw4.pdf
- Ka wacaya IRS lambarkan 1-800-829-3676 kadibna ka codsanaya in foom lagu soo diro.

Khaanadaha 1, 2, 3, iyo 5 waa meelaha loo baahan yahay. Khaanadaha 4, 6, iyo 7 waa kuwo ikhtiyaari ah. Ka tag khaanadaha 8, 9, iyo 10 iyaga oo maran. Hubso in aad saxiixdid oo aad ku qortid taariikhdid salka hoose ee bogga halkaas oo ku qoran “Saxiixa Shaqaalaha” iyo “Taariikhda”.

Boostada ama fakis ugu soo dir foomka W-4 ee IRS ee la buuxiyay:

FAKIS bilaash ah #1-855-901-6904

Public Partnerships, LLC: WA IPOne
7776 S Pointe Pkwy W Suite 150
Phoenix, AZ 85044

Separate here and give Form W-4 to your employer. Keep the worksheet(s) for your records.

W-4 Form Department of the Treasury Internal Revenue Service	Employee's Withholding Allowance Certificate ▶ Whether you're entitled to claim a certain number of allowances or exemption from withholding is subject to review by the IRS. Your employer may be required to send a copy of this form to the IRS.	OMB No. 1545-0074 <div style="font-size: 2em; font-weight: bold;">2019</div>
1 Your first name and middle initial _____ Last name _____		2 Your social security number _____
Home address (number and street or rural route) _____		3 <input type="checkbox"/> Single <input type="checkbox"/> Married <input type="checkbox"/> Married, but withheld at higher Single rate. <small>Note: If married filing separately, check "Married, but withheld at higher Single rate."</small>
City or town, state, and ZIP code _____		4 If your last name differs from that shown on your social security card, check here. You must call 800-772-1213 for a replacement card. ▶ <input type="checkbox"/>
5 Total number of allowances you're claiming (from the applicable worksheet on the following pages)		5 _____
6 Additional amount, if any, you want withheld from each paycheck		6 \$ _____
7 I claim exemption from withholding for 2019, and I certify that I meet both of the following conditions for exemption. <ul style="list-style-type: none"> • Last year I had a right to a refund of all federal income tax withheld because I had no tax liability, and • This year I expect a refund of all federal income tax withheld because I expect to have no tax liability. If you meet both conditions, write "Exempt" here ▶ 7 _____		
Under penalties of perjury, I declare that I have examined this certificate and, to the best of my knowledge and belief, it is true, correct, and complete.		
Employee's signature <small>(This form is not valid unless you sign it.) ▶</small>		Date ▶ _____
8 Employer's name and address (Employer: Complete boxes 8 and 10 if sending to IRS and complete boxes 8, 9, and 10 if sending to State Directory of New Hires.) _____		9 First date of employment _____
		10 Employer identification number (EIN) _____

Haddii aad hore si wayn ugu jirtid canshuuraha dakhliga dowlada hoos-taga xajinta, Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS) waxaa dhici karta in uu kugu wargeliyo oona kuu soo diro warqad PPL (lagu magacaabo "Warqada-Xiran") midaas oo qadar xadidan oo canshuurta dakhliga dowlada lagu xajinayo. Haddii xaaladdu ay sidan tahay, DSHS iyo PPL waa in ay u hoggaansamaan ilaa oggaysiis dheeraad ah uu ka yimaado dhinaca Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS). Haddii aad heshid Warqada-Xiran ee Adeegga Dakhliga Gudaha (IRS), waxaa ku qoran lambar lacag la'aan ah midkaas oo aad kasoo wici karto haddii aad muran ka qabtid.

Haddii aad qabtid su'aalo, fadlan ka wac xarunta wacitaanka IPOne lambarkan 844-240-1526. Fadlan ogow in midkoodna shaqaalaha IPOne ama shaqaalaha DSHS aysan ahayn xirfadlayaal canshuur, oo aysan ku siin karin wax talo canshuur ah. Ha weydiisan shaqaalaha PPL ama DSHS caawimaad ay kugu caawiyaan qaadashada go'aannada canshuurta. Haddii jawaabta su'aashaadu ay noqonayso talo canshuur, waxaa lagu guddbinayaa in aad talo ka raadsato la-taliye canshuur, xisaabiye, ama IRS. SEIU 775 iyo ururrada bulshada qaarkood ayaa waxaa laga heli karaa caawi caawimaad canshuur bilaash ah.

Dakhliga Ka-reeban ee hoostaga Dhibaata Daryeelka

Haddii aad tahay Daryeel Bixiyaha Shaqsiga (IP) ee la nool macamiilkaaga, dakhliga aad ku kasbato bixinta adeegyada daryeelka waxaa laga reebi karaa canshuurahaaga dakhliga ee federaalka (FIT).

Daryeel Bixiyayaasha Shaqsiga ah waxaa ay xaq u leeyihiin ka-reebidda dakhliga Dhibaata Daryeelka haddii IP uu guri kula nool yahay macmiilka DSHS. Tani macanaheedu waa in mushaaraadka daryeel bixiyayaasha shaqsiga ah ka helaan bixinta daryeelka shaqsi ee macamiilka DSHS ee ay la nool yihiin waxaa looga reebaa dakhliga IP-ga ujeedooyinka canshuurta dakhliga.

Ka-reebidda dakhliga Dhibaata Daryeelka waxaa lagu dabaqi karaa oo kaliya adeegyada daryeelka shakhsi iyo daryeelka ku-meelgaarka ah, kuwaas oo si gaar ah loogu qoro Bayaamada Kasabka dhammaadka sannadka. Ka-reebnaanta looma adeegsado lacag-bixinnada loo bixiyay daryeelka ku-meelgaarka ah, tababarka barashada xirfadaha, wakhtiga safarka, tababarada loo baahan yahay, ama wakhtiga fasaxa ee lacagta lagu bixiyo. Ka-reebnaanta dakhliga laguma dabaqi karo lacag-bixinnada aad sida tooska ah uga hesho macaamiishaada, kuwaas oo loo yaqaanno lacag-bixinnada "ka-qaybgalka" ama "mas'uuliyadda macmiilka".

Waa mas'uuliyadaada in aad go'aamiso haddii ka-reebidan dakhliga lagu adeegsan karo. Sidoo kale, waxaad mas'uul ka tahay aqoonsashada lacag-bixinnada loogu talagalay adeegyada daryeelka shakhsi ama daryeelka gargaarka iyo ka-dib ka reebidda kaliya qadarradaasi mushaaraadkaaga guud ee canshuur celinadaada. Haddii aad u baahan tahay caawimo, ama aad qabtid su'aalo ku saabsan xaq-u-yeelashadaada, ama sida loo xareeyo canshuur celintaada dhammaadka sannadka, fadlan la soo xiriir xirfadle canshuur ama IRS.

Haddii aad su'aalo qabtid, fadlan eeg www.dshs.wa.gov/altsa/irs-notice-2014-7-difficulty-care-payments-excludable-income ama waxaad kala xiriiri kartaa miiska canshuurta DSHS:

(866) 563-8155 (Telefoon bilaash ah)

(360) 664-5830 (Lacey/Olympia)

taxinfo@dshs.wa.gov

BAYAANKA MUSHAARKA EE W-2

Foomka W-2 waa bayaanka mushaarka midkaas oo sheegaya qaybaha ay ka canshuuri karaan dakhliyadaada federaalka iyo dowlada waddanka. Waxaad heli kartaa bayaanka mushaarka ee W-2 ee loogu talagalay loo shaqeeye kasta ee wax ka kasbatay sannadkaasi, iyo W-2 loogu talagalay lacag-bixintaada xilliga fasaxa ah. Daryeel Bixiyayaasha Shaqsi ee qaarkood waxaa ay heli karaan W-2 loogu talagalay lacag-bixinta xilliga fasaxa ee la kasbaday ka hor 2016, oo sheegaysa “Macmiil Been ah”.

PPL waxaa ay boostada kuugu soo diri doontaa bayaamada mushaarka ee W-2 kama dambeys 31ka Jannaayo (ama maalin shaqo ee ku xigta haddii 31ka Jannaayo ay timaado ayada oo fasax dhammaadka todobaadka ah/fasax caadi ah lagu jiro) ee ah sannadka kadib marka aad lacagta bixisay. Tusaale ahaan, haddii aad lagu siiyay dakhli sannadka 2018, Foomkaaga W-2 ee loogu talagalay kasbashooyinkaas waxaa la soo diri doonaa 31ka Jannaayo, 2019. Waxaa nuqulka elektaroonig ah ee W2 lagu daabacay warbixinta bixiye kasta ee IPOne.

Bayaamada mushaarka ee W-2 waxaa ka mid noqon doona lacag-bixinada aad ka heshay nidaamka lacag-bixinta IPOne. Mushaarada aad sida tooska ah uga hesho loo-shaqeeyahaaga laguma dari doono bayaanka mushaarka ee W-2 ee aad heshid. Qaddarka laga jarey Canshuurta Dakhliga Federaalka iyada oo la raacayo foomkaaga W-4 ee faylka ku jira waxaa lagu muujin doontaa foomkaaga W-2. Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan W-2 ee aad ka heshid PPL, ka wac Xarunta Wicitaanka IPOne lambarkan 844-240-1526. Shaqaalaha xarunta wicitaanka IPOne ma awoodaan in ay bixiyaan talo canshuur waxaa ayna kugu hagi karaan in aad la xiriirto la-taliye canshuur ama xirfadle canshuur kale, xisaabiye, ama IRS.

CANSHUURHA MEDICARE IYO DAMAANNADA BULSHADA


Waloow PPL aan ahayn qofka aad u shaqaysid, PPL waxay masuul katahay xajinta iyo lacag bixinta Dammaanada Bulshada iyo canshuurta Daryeelka caafimaadka (FICA) lagu sameeyo dakhliyadaada adiga lagaa siiyay dhinaca PPL ayada oo matalaysa qofka aad u shaqaysid.

Waxaa dhici karta in lagaaga reebo canshuurta dammaanada bulshada iyo shaqo la'aanta sababo la xiriira da'daada, xaaladaada ardaynimo, ama xiriirka qoys ahaaneed ee aad la leedahay qofka aad u shaqaysid. Si aad u oggaatid haddii aad ka reebantahay wac Xarunta Wicitaanka IPOne ama kasoo degso Codsiga loogu talagalay Ka reebitaanada Canshuurta Shaqaalaynta Kusalaysan Da'da, Xaalada Ardayga, iyo Xiriirka Qoyska halkan: www.publicpartnerships.com/programs/washington/ipone/index.html

Hoosta sharciga dowlada, ka reebitaankan ma ahan mid doorasho ay tahay. Haddii aad kasoo baxdid shuruudaha ka reebitaanka canshuurta waxaa khasab kugu ah in aad u buuxisid foom qofkasta oo aad siisid daryeel kadibna usoo dir foomka dhinaca IPOne.

- Haddii aad qabtid su'aalo ama wel-welo, waxaad kala xiriiri kartaa Adeega Dakhliga Gudaha (IRS) cinwaankan www.irs.gov ama booqo xafiiskaaga degaanka.
- PPL sidoo kale waxay masuul ka tahay lacag bixinta Federaalka ama dowlada iyo Canshuurta Shaqo la'aanta Gobolka (FUTA/SUTA).
- Qofka aad u shaqaysid sidoo kale wuxuu masuul ka noqon karaa xajinta canshuurta Daryeelka caafimaadka iyo Dammaanada Bulshada ee lagu sameeyo qadarka lacagta qofka aad u shaqaysid kuu siiyo si toos ah.

Shaqaalaha xarunta wicitaanka IPOne kaliya waxay ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan W-2-yada lagaaga soo saaray dhinaca PPL. Shaqaalaha xarunta wicitaanka IPOne looma soo wici karo wixii ku saabsan latalin canshuureed.



Macluumaad Guud ee Shaqaaleynta

DOORASHOYINKA CAYMISKA CAAFIMAADKA

Waxaad haysataa laba doorasho oo caymiska caafimaadka ah: Kooxda Dheefaha SEIU 775 ama kala-dhoorasho caymis caafimaad laga heli karo Washington Health Benefit Exchange. **Waxaad kaliya isku qori kartaa mid ka mid ah qorshayaashan caafimaad.**

Kooxda Dheefaha SEIU 775

Kooxda Dheefaha SEIU 775 waxaa ay bixiyaa dheefaha caafimaadka, ilkaha, daawada la isu qoro, aragga, maqalka ee shaqaalaha kaliya la siiyo, barnaamijka caawinta shaqaalaha (EAP), iyo dheefaha caafimaadka dhaqanka Daryeel Bixiyayaasha Shaqsiga ee Xaqa u leh. Kooxda Dheefaha SEIU 775 ma bixiso caynsanaanta loogu talagalay lammaanaha ama dadka ku tiirsan. Caynsanaanta Daryeel Bixiyayaasha Shaqsiga ee xaqa u leh Medicare ayaa sidoo kale laga heli karaa Kooxda Dheefaha SEIU 775 **sida caynsanaanta aasaasiga ah ahaan.**

Shuruudaha diiwaangelinta iyo xaq-u-yeelashada dheefaha daryeelka caafimaadka waxaa go'aamiyaa Kooxda Dheefaha SEIU 775. Shuruudaha ugu yar ee hadda ah waxay yihiin in:

- Aadan ka qaadanin dheefaha daryeelka caafimaad ee caymiska kale ee goys ama caymis kale ee ku salaysan shaqaaleynta.
- Aad shaqaysid ugu yaraan laba bilood oo isku xiga oo ah ugu yaraan 80 saacadood bil kasta ah. Kuwan waxaa ka mid ah dhammaan saacadaha la shaqeeyay ee la sheegtay; tusaale ahaan, saacado tababar, saacado safax, iyo saacado loo shaqeeyay sida Daryeel-bixiye Wakaaladeed.
- Aad bixiso \$25.00 ee ah lacagta joogtada ah ee caymiskla ee la wadaago ee caynsanaanta daryeelka caafimaad, taas oo laga jari doono jeegaaga lacag-bixinta caadiga ah ka-dib marka aad isku qorto.
- Waa in aad buuxiso codsiga isqoritaanka kadibna aad ku soo celiso Kooxda Dheefaha SEIU 775. Waxaad heli kartaa codsiga isqoritaanka adiga oo ka wacaya Xarunta Kheyraadka Xubinka (MRC) lambarkan 1-866-371-3200 ama online-ka www.myseiubenefits.org/. Kooxda Dheefaha SEIU 775 waxaa ay kuu soo diri doonaan codsiga loogu talagalay caynsanaanta caafimaadka marka aad u qalanto caynsanaanta caafimaad. Codsiga waxaa loo diri doonaa cinwaanka ku qoran faylka IPOne.
- Ka-dib marka aad shaqeyso laba bilood oo isku xigta 80 saacadood, oggolaw muddo maamul hal bil ah, caynsanaanta waxaa ay ka-dib bilaabanaysaa maalinta koowaad ee bishaada 4aad. Waxaa intaa dheer, caynsanaanta joogtada ah, waa in aad sii wado shaqeynta 80 saacadood bil kasta.

Aad iyo aad yay muhiim u tahay in aad sheegato saacadahaaga shaqada waqtiga loo baahan yahay bil kasta iyada oo loo marayo IPOne si looga fogaado farogelinta caynsanaantaada caymiska daryeelka caafimaad. Fadlan u diiwaangeli saacadahaaga sida ugu dakhsiyaha badan ee suurtagalka ah. Si aad u heshid macluumaad badan oo ku saabsan shuruudaha u qalmitaanka iyo dheefaha ama codsashada codsiga isqorida, fadlan ka wac Xarunta Kheyraadka Xubinka (MRC) lambarkan 1-(866) 371-3200.

Washington Health Benefit Exchange

Caynsanaanta caymiska caafimaadka sidoo kale waxaa laga helayaa Washington Health Benefit Exchange. Ayada oo ay ku tiirsantahay halka aad ku nooshahay iyo duraafahaaga qofeed, waxaad heli kartaa tiro doorashooyin qorshe caafimaad la awoodi karo. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan doorashooyinka Washington Health Benefit Exchange ama si aad u codsatid caynsanaanta, booqo bogga internetka Raadiyaha Qorshaha Caafimaadka cinwaankan www.wahealthplanfinder.org.

Haddii aad qabtid su'aalo wac Xarunta Taageerada Macamiilka, Isniin-Jimco 7:30 subaxnimo. - 8:00 habbeenimo, lambarkan 1-855 923-4633. Caawimaada waxaa lagu helayaa luuqado badan.

Haddii aad u baahantahay caawimaad laguugu caawiyo codsigaaga ama fahamka doorashooyinka qorshahaaga caafimaad, dalaaliinta la diiwaan geliyay iyo haggayaal la aqoosan yahay ayaa la heli karaa si laguugu caawiyo luuqado badan.

- Si aad u hesho dalaal diiwaangashan, booqo bogga internetka raadiyaha dalaalka: www.wahealthplanfinder.org/HBEWeb/Annon_DisplayBrokerNavigatorSearch.action?brokerNavigator=BRK
- Si aad u heshid hagge la aqoonsan yahay ama rukhsadaysan, booqo bogga internetka raadiyaha haggaha halkan: www.wahealthplanfinder.org/HBEWeb/Annon_DisplayBrokerNavigatorSearch.action?brokerNavigator=NAV



HAWLGABKA

Daryeel Bixiyayaasha Shaqsi (IPs) qaarkood waxaa ay xaq u leeyihiin dheerfta magdhowga ee laga bixiyo Sanduuqa Magdhowga. Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan dheeftan iyo kuwo kaleba kala xiriir Xarunta Kheyraadka Xubinka lambarkan 1-866-371-3200.

HELIDA MACAAMIIL DHEERAAD AH



Diiwaanka Gudbinta Daryeelka Guriga wuxuu adeegsadaa qalab internetka ku saleysan oo online-ka ah si ay isu waafajiyaan daryeel bixiyayaasha shaqsi ee shahaadaysan iyo dadka u baahan adeegyada daryeelka muddada-dheer. Isku-qorida Diiwaanka Gudbinta waa mid fudud. Wac ama booqo xafiiska Diiwaanka ee degaanka si aad uga dhigtid hawsha in ay bilaabato. Waxaad ka heli kartaa xafiiska Diiwaanka Gudbinta degaanka adiga oo wacaya lambarkan 1-800-970-5456 ama booqo www.hcrr.wa.gov kadibna guji “Registry Offices” “Xafiisyada Diiwaanka” si aad u oggaatid haddii Diiwaanka Gudbinta laga heli karo meesha aad joogtid.

Shaqaalaha jooga Xarunta Diiwaanka Gudbinta waxay sidoo kale dadka ku caawin karaan in ay bilaabaan in ay u shaqeeyaan sida daryeel bixiyayaasha shaqsiga.



Carina waa mareegto qofka iskiisa u adeegto oo bilaash ah oo loo abuuray in ay ku caawiso Daryeel Bixiyayaasha Shaqsi ee la xaqiijiyay iyo macaamiisha daryeelka guriga gudahiisa ee Medicaid in ay is-helaan. Carina waxaa ay iskaashi shaqo la leedahay Kooxda Dheefaha SEIU 775 iyo DSHS si ay u bixiso adeeggan. Kaliya raac tallaabooyinkan soo socda marka aad booqato www.carinacare.com

- Tallaabada 1: Diiwaangeli- Hawlgeli koontadaada Carina adiga oo gujinaya batoonka “diiwaangeli” “register” ka-dibna ka jawaabaya dhowr su’aalood.
- Tallaabada 2: Iswaafaji- Sahami shaqooyinka la soo dhejiyay iyo warbixinnada shaqsi. La xiriir bixiye ama macmiil ka soo baxa baahiyadaada.
- Tallaabada 3: Oggolow- Wac maareeyaha kiiskaaga si aad u soo gebogebayso oggolaanshaha bixiyahaaga ka-dibna bilow.

Xoggaga loogu talagalay Daryeel bixiyayaasha

Macluumaad iyo taageero loogu talagalay daryeel bixiyayaasha shaqsi sidoo kale waxaa si toos-ah looga helayaa bogga internetka Diiwaanka Gudbinta Daryeelka Guriga. Ku dhufo dusha (Provider Resources) Xoggaga Daryeel bixiyaha si aad u cusboonaysiisid macluumaadka ku saabsan cudurada iyo xaaladaha, naseexooyinka daryeel bixinta, wararka hadda ah iyo mowduucyada loogu talagalay daryeel bixiyayaasha.

MAGDHOWGA SHAQAALAHA

Daryeel bixiyayaasha shaqsiga (IPs) waxaa laga caymiyay dhinaca caymiska magdhowga shaqaalaha iyada oo loo marayo Waaxda Shaqaalaha iyo Warshadaha ee Gobolka Washington. Midaana macnaheedu waxay tahay in aad fayl garayn karto sheegashada dheefaha ee ku saabsan jiro ama dhaawac kasta oo shaqo-xiriir la leh.

Haddii aad dhaawacantay adiga oo bixinaya adeegaha la siiyo qofka aad u shaqaysid una baahantahay daryeel caafimaad deg-deg ah, aad isbitaalka ugu dhow ama u tag dhakhtarkaaga joogtada ah. U sheeg dhakhtarka in dhaawacaaga ama jiradaadu ay tahay mid xiriir la leh-shaqada iskana hubso in aad codsatid kadibna buuxisid foomka “Soo sheegida Dhaawaca ama Cudurka Shaqada”. Ku qor qofka aad u shaqaysid foomka ah sida HCQA Negotiated Contract, 601 Union St., Suite 3500, Seattle, WA 98101.

Shirkad lagu magacaabo Sedgwick CMS ayaa maamulaysa dhammaan sheegashooyinka magdhowga shaqaalaha ee loogu talagalay daryeel bixiyayaasha shaqsi. Kala xiriir teleefoonka lacag la'aanta ah 1-866-897-0386 haddii aad ku dhaawacantay shaqada.



TIXRAACYADA, XAQIJJINTA SHAQAALEYNTA, CADDEYNTA DAKHLIGA

Tixraaca Shaqada

Waa mid ku xiran qofka aad u shaqaysid si aad u siisid tixraacaaga shaqada. Waxaa wanaagsan in aad ka heshid tixraac shaqo qoran qofka aad u shaqaysid. Waxaa la dhiirrigelinayaa in aad hesho tixraaca shaqada qoran marka ay suurtoagal tahay si loo-shaqeeyahaaga uu kuu siiyo. U sheeg qofka aad u shaqaysid in aadan ka fikiraynin in aad hadda ka tagtid balse ka fikiraysid mustaqbalka iyo maalmaha soo socda.

Xaqiijinta Shaqaalaynta

Dadka u baahan in ay xaqiiqsadaan shaqaalayntaada waa in lagu haggio dhinaca qofka aad u shaqaysid. Shaqaalaha Bulshada, Maareeyaha Kiiska ama wakiil kasta oo ka socda Gobolka Washington ma ahan mid awoodi kara in uu adiga midaan kuu sameeyo.

Caddeynta Dakhlige

Haddii qof ama shirkad ay doonayaan caddeyn ku saabsan dakhligaaga, la xiriir IPOne si aad u hesho caawimaad. Adigu kama heli kartid caddetyn dakhli Shaqaalaha Bulshada iyo Maareeyaha Kiiska loo-shaqeeyahaaga.

Ugu dir codsiga qoraalka ah ee xaqiijinta mushaarka midkood fakis ama boostada Mareykanka PPL si ay u socodsiiyo hawshiisa.

- **Fakis** ugu dir codsigaaga lambarkan fakiska: 1-855-901-6904. Habkan waa sida ugu fudud ee aad ku heli kartid jawaabtaada xaqiijinta mushaarka.
- **Boostada** ugu dir codsigaaga xaqiijinta mushaarka cinwaankan:

Public Partnerships, LLC
WA IPOne
7776 S Pointe Pkwy W, Suite150
Phoenix, AZ 85044

Codsigaaga waa in ay ku qoran yihiin magacaaba iyo cinwaanka lagu soo celinayo ee ah meesha aad doonayso in xaqiijinta mushaarka loo diro. Sidoo kale waa in aad ku xadidaa muddooyinka wakhtiga ee aad u baahan tahay caddeynta dakhliga. Fadlan oggolow 2-5 maalmood oo kuwa shaqada ah si codsigaaga hawshiisa loo fuliyo oo xaqiijinta loo siiyo cidda codsanaysa. Codsiyada u baahan jawaab isla maalintii ah lama ballanqaadi karo, iyada oo sabab u ah arrimaha hawl socodsiiinta iyo culeyska shaqo.

HADDII AAD KA TAGTID SHAQADAADA

Waa in aad siisid ugu yaraan labbo todobaad oggaysiis qoran ka hor in aadan ka tagin shaqada loo-shaqeeyahaaga. Waa in aad ku shaqaysid jadwalkaaga laguu qoondeeyay illaa dhammaadka muddada oggaysiiskaasi. Ka tagida qofka aad u shaqaysid kaligeeda ayada oo aan haysan caawimaadda loo baahan yahay waxaa loo tixgelinayaa dayicid midaas oo ah mid lid ku ah sharciga.

Waa in aad siisid oggaysiis ka tagid ah:

- Qofka aad u shaqaysid iyo/ama wakiilkeeda ama wakiilkiisa sharciyeed. Waa in uu noqdo mid qoraal ah.
- Shaqaalaha Bulshada ama Maareeyaha Kiiska qofka aad u shaqaysid.
- Qof kastoo kale ama ururo oo uu qofka aad u shaqaysid codsado ama u baahan yahay in lagu wargeliyo.

DHEEFAHA SHAQO LA'AANTA

Haddii shaqadaada ah Daryeel Bixiyaha Shaqsiga (IP) ay dhammaato ama shaqadaada la joojiyo muddo, waxaad ka codsan kartaa Waaxda Damaannada Shaqaaleynta dheefaha shaqo la'aanta (sidoo kale lagu magacaabo caymiska shaqo la'aanta). Waa in aad kasoo baxdid mid kasta oo kamid ah xeerarka Waaxda Dammaanada Shaqaalaynta wixii ku saabsan sheegashada dheefaha shaqo la'aanta ah. Marka aad buuxinayso codsiga, isu sheeg in aad tahay Daryeel Bixiyaha Shaqsi ee Gobolka Washington. Macmiilkaaga waa loo-shaqeeyahaaga, balse taariikhdaada shaqo iyo mushaaraadka loo adeegsan doono in lagu go'aamiyo xaq-u-yeelashadaada shaqo la'aanta waxaa ay ka imaan doonaan IPOne.



Ka-warbixinta Khasabka ah ee Xadgudubka

Sharci ahaan, waxaa lagaaga baahan yahay in aad u soo sheegtid si dhakhso ah haddii aad ka shakhsid in qof wayn oo nugul ama ilmo yar dhib loo gaystay.

WAA KUMA QOFKA WEYN EE NUGUL?

Qof kasta oo wayn qofkaas oo da'diisu tahay 60 sanno ama kawayn midkaas oo aan asaga isdaryeeli karin waxaa loo tixgelinayaa in uu yahay qofka weyn oo nugul. Dadka kale ee weyn kuwaas oo loo tixgelinayo in ay yihiin dad nugul waxaa ka mid ah:

- Dadka waaweyn ee haysta masuul sharciyeed
- Dadka waaweyn ee qaba naafonimo koritaan
- Dadka waawayn ee ku nool xarunta daryeelka muddada-dheer ama guri qoys qof weyn
- Dadka waaweyn ee qaadanaya daryeelka gudaha-guriga ah ama adeegyo daryeel shakhsiyeed

WAA MAXAY XADGUDUB?

- Dhib ula kac ah oo u keenaya xanuun, dhibaato iyo/ama dhaawac qof weyn oo nugul
- Wuxuu noqon karaa mid jireed, maskax, galmo, ama isticmaal aan sixiix ahayn oo loo isticmaalo xanibaado
- Wuxuu noqon karaa dayicid, ka tagid, kafa'ideysi shakhsiyeed, ama kafa'ideysi dhaqaale oo lagu sameeyo qof weyn oo nugul
- Wuxuu noqon karaa naf-dayicid ku saabsan qaybta qofka wayn ee daciifka ah

Wac Adeegaha Ilaalinta Qofka wayn (APS) haddii aad qabtid sabab aad u aaminsantahay ama ugu shakhsantahay nooc kasta oo xad gudub ah oo loo gaysto qofka wayn ee daciifka ah.

SOO SHEEGIDA XAD GUDUBKA LAGA SHAKIYAY

Si aad u soo sheegto xadgudubka qofka weyn ee laga shakiyo:

Hubso in aad ku soo sheegto online-ka ama tooska mareegtadan:

www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/report-concerns-involving-vulnerable-adults

GOBOLKA 1

Lambarada Xiriirka APS: 1-800-459-0421 (TTY) 509-568-3086

Spokane, Grant, Okanogan, Adams, Chelan, Douglas, Lincoln, Ferry, Stevens, Whitman, Pend Oreille, Yakima, Kittitas, Benton, Franklin, Walla Walla, Columbia, Garfield, Asotin, Klickitat

GOBOLKA 2

Lambarada Xiriirka APS: 1-866-221-4909 (TTY) 1-800-977-5456

Snohomish, Skagit, Island, San Juan, Whatcom, King

GOBOLKA 3

Lambarada Xiriirka APS: 1-877-734-6277 (TTY) 1-844-433-5367

Bremerton, Pierce, Thurston, Mason, Lewis, Clallam, Jefferson, Grays Harbor, Pacific, Wahkiakum, Cowlitz, Skamania, Clark

Si aad u soo sheegto xadgudubka carruurta ee laga shakiyay:

GOBOLKA 1

1-800-557-9671

Degmooyinka Asotin, Garfield, Whitman, Adams, Grant, Douglas, Chelan, Okanogan, Ferry, Stevens, Pend Oreille, Spokane, Lincoln

GOBOLKA 2

1-855-420-5888

Degmooyinka Kittitas, Yakima, Klickitat, Benton, Franklin, Walla Walla, Columbia

GOBOLKA 3

1-866-829-2153

Degmooyinka Whatcom, Skagit, Snohomish, Island, San Juan

GOBOLKA 4

1-800-609-8764

Degmada King

GOBOLKA 5

1-888-713-6115

Degmooyinka Pierce iyo Kitsap

GOBOLKA 6

1-888-713-6115

Degmooyinka Clallam, Jefferson, Mason, Grays Harbor, Thurston, Lewis, Pacific, Cowlitz, Clark, Skamania, Wahkiakum

SOO SHEEGIDA WALAACA KU SAABSAN XARUNTA DARYEELKA

Usoo sheeg wel-welada ku saabsan guriga qoyska qofka wayn, xarunta nolosha la caawiyay, ama guriga kalkaalinta dhinaca Qaybta Xalinta Cabashada (CRU). Soo sheegida waxaa loo samayn karaa qaab toos internetka ah ama qaab teleefoon.

U samee soo sheegidaada qaab toos internetka ah

www.dshs.wa.gov/altsa/home-and-community-services/report-concerns-involving-vulnerable-adults

Lambarka Xiriirka Waddanka oo dhan ee Qaybta Xalinta Cabashada

1-800-562-6078 (TTY) 1-800-737-7931

Hagidda Deg-dega ah ee Kheyraadka

SHAHAADO AQOONSI TABABAR IYO KAALIYAHA DARYEELKA GURIGA

- DSHS: www.dshs.wa.gov/altsa/long-term-care-professionals-providers
- Waaxda Caafimaadka: www.doh.wa.gov/LicensesPermitsandCertificates/ProfessionsNewReneworUpdate/HomeCareAide
- Prometric: www.prometric.com/en-us/clients/wadoh/Pages/landing.aspx

PROVIDERONE EE SHAQSIGA

- Xarunta Wicitaanka Washington: 1-844-240-1526
- Iimaylka: pplwaipone-cs@pcgus.com
- Kheyraadka IPOne ee Iskaashatada Dadweynaha LLC ee Washington, macluumaadka tababarka iyo in dheeraad ahba: www.publicpartnerships.com/programs/washington/ipone/
- Macluumaad Guud: www.ipone.org
- Bogga ProviderOne ee shaqsiga: <https://ipone.publicpartnerships.com/login.aspx>

SEIU 775

- Dheefaha ururka: www.seiu775.org
- Iimaylka Xarunta Kheyraadka Xubinka: mrc@seiu775.org
- Lambarka telefoonka Xarunta Kheyraadka Xubinka: 1-866-371-3200

Si aad qof ugula hadasho luuqad kale, garaac mid ka mid ah khadadkan dheeriga ah ee ku qoran shaxdan hoose.

KOOXDA DHEEFAHA SEIU 775

- Shuruudaha iyo ikhtiyaarada tababarka: www.myseiubenefits.org
 - Ikhtiyaadada iyo guudmarka Dheefaha Caafimaad: www.myseiubenefits.org
 - Guudmarka Hawlgabka Sugaan iyo Su'aalaha Inta Badan la Isweyddiiyo: www.myseiubenefits.org

- Iimaylka Xarunta Kheyraadka Xubinka: mrc@seiu775.org
- Lambarka telefoonka Xarunta Kheyraadka Xubinkr: 1-866-371-3200

Si aad qof ugula hadasho luuqad kale, garaac mid ka mid ah khadadkan dheeriga ah ee soo socda.

Luuqadda	Khadka dheeraadka ah	Luuqadda	Khadka dheeraadka ah
Ruush	411	Soomaali	431
Yukraniyan	412	Carabi	432
Isbaanish	413	Mandariyan	423
Koriyan	421	Fiitnaamiis	422
Cantonese	424	Sawaahili	433
Tagalog	442	Cambodian	441

TOWJIIHIYE KHIRRAD LEH

KOOXDA DHEEFAHA SEIU 775 Jowjiihiyaha khibrada leh ee ah HCA shahaado haysta ayaa kugu caawin kara in aad kalsooni ku hesho aqoonta iyo xirfadaha laga bartay Tababarka Aasaasiga ah.

- Towjiihiyaha Khibrada leh: www.myseiubenefits.org/peermentors/
- Telefoom lambarka Towjiihiyaha Khibrada leh: 1-855-803-2095
- Iimaylka Towjiihiyaha Khibrada leh: Peer.Mentorship@myseiubenefits.org

Boosaska Towjiihiyaha Khibrada leh waxaa laga yaabaa in ay furan yihiin min wakhti ilaa wakhti. Si aad u codsatid in aan noqoto towjiihiyaha khibrada leh, fadlan booqo: www.myseiubenefits.org/work-with-us/. Wakhtiga loo shaqeeyay sida tababare laguma xisaabin doono saacadaha shaqada isku aruuray. Haddii aad daneynayso in lagu tixgeliyo fursad towjiihin mustaqbalka ah, fadlan iimayl u dir Peer.Mentorship@myseiubenefits.org

ISKU DIIWAANGELI GOVDELIVERY:

<https://public.govdelivery.com/accounts/WADSHSALSA/subscriber/new>

Xulo *Loo-shaqeeyaha Ku Jihaysan Macaamiisha* hoosta “Wararja iyo Kheyraadka”

Si aad uga hesho warar cusub iyo macluumaad Maamulka Naafada Koriinka:

<https://public.govdelivery.com/accounts/WADSHSDDA/subscribers/new>

BOOQO MAREEGTADA CDE:

www.dshs.wa.gov/altsa/cde



Macluumaad kasta oo ku qoran Hagaha Tixraaca kama turjumayso ama tilmaamayso qandaraaska shaqaaleynta ama samaynayo asalka loogu talagalay shaqaaleynta socota ee ah sida Daryeel bixiyaha Shaqsiya ah. Haddii uu jiro khilaaf u dhaxeeya macluumaadka ku qoran gudaha Hagaha Tixraaca iyo qandaraaskaaga, haddaba midka ku qoran qandaraaskaaga ayaa noqonaya midka saxda ah.

Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Bulshada ma ahan mid dad ugu samaynayo midab takoor adeegyada ama qandaraaska lala galo dadka qaab ku salaysan jinsiyad, midab, asal dhallasho, nooca qofka, aqoonsiga qofka, sheegida qofka noociisa, jiheyn galmu, da', diin, caqiido, xaaladda guurka, naafonimo, ama xaalad Halyeey hore ee Xilligii Fiitnaam ah, ama jiritaanka naafonimo dareenka, maskaxda, ama jirka ah.

Dokumentigan waxaa beddeli doona Loo-shaqeeyaha Jiheeya Macaamiisha marka
CDE uu bilaabo hawlgallada iyo shaqaaleynta Daryeel Bixiyaha Shaqsigu (IP)
Fadlan booqo www.dshs.wa.gov/altsa/cde hadaad rabto macluumaad dheeraad ah.



Transforming lives

DSHS 22-221 SM (Rev. 5/19) Somali